Axmed Nuur: Waxa weeye, ka gudbimayno oo waxaa weeye, ama qal ama qaad ama qoorta saar waa ku qabsatay weeye; waynu ka hadleynaa innaga intaynu ka garanayno. Bal hadda ninka la yiraahdo Fiqi Buraale iyo rag baa aad u garanaaya, waxaan moodayaa in intaa in ka badan laga sii sheegi-kareynin, ama u fiirsadkaa oo uu u fiirsaday, aan laga sii sheegi-karaynin. Waxaa weeye sidaynu sheegnay. Waxaan u gudbinayaa ninka la yiraahdo Fiqi Buraale. Fiqi Buraalow meeshaada warkii ka billow.

Fiqi Buraale: Waa tahay. Horta mirahan la cuno ee ay galayda iyo masaggada waa laba nooc oo kala duwan haba ahaatee soomaalidu ay aad u wada cunto. Haddii aynu u leexanno gallayda laba magac baan anigu u aqaannaa gallayda. Bolawgeeda hore magaceeda, galbeed magac bay u yaqaanniin, koonfurna waxay yiraahdaan gallay bay tiraahdaa; geestaas waqooyi waxaa looga yaqaannaa arabiqi, yaa looga yaqaannaa. Mar haddii aad arabiqi maqasho nin reer galbeed uu ku yiraahdaa waxaa weeye wuxuu u jeedaa gallayda. Marka la beeranaayana waa la abuuray iyo waa la shinideeyay baa la kala yiraahdaa. Galbeed wuxuu yiraahdaa: beertii waan soo shinideeyay; marka beer koonfur ay tahayna waxaa la yiraahdaa: waan soo abuuray beertii. Meeshaa la abuuraayo dadka abuuraayaa shinidaa ay gelinayaan markay shineeyaan ama abuuraayaan sidii caashaan (*calaashaan*) injineer oo kale ayey u abuuraan oo hadday miro ba meeshaa ku ridaan waxay diidayaan inay is-gubto galkaa sii baxaaya iyo gallayda soo baxaysa balkeeda soo baxaaya, inuu meel ku ururo oo is-gubo ayuu diidayaa markaas la abuuro oo ay soo buqisho qolana ay tiraahdo waa soo bilqishayoo calaashaan way soo baxday qolana haddi maayo (*haddii Allah idmaayo*) ay magac kale u taqaanno, galbeedka iyo koonfurta weligeed waa kala duwan yahay magaceeda. Qolana waxay tiraahdaa waa bilqishay qolana waxay tiraahdaa, waaba liqay eraygii e, muxuu ahaa? Maya, finjilkaas waa dambeeyaa markaas, calaashaan, ay soo baxdo, madaxa la timaado bal waxay tiraahdaa waa dhilisoowday. Waa dhiloowday, waa bilqishay, calaashaan waa marka ay saas u soo baxayso baa magacyadaa la kala yiraahdaa. Marka ay aad u soo baxdo oo ay soo dheeraato oo xubnaheedu adkaadaan oo xitkeedu ay, ma garanaysaa calaashaan, marka la yiraahdo, qolana waxayba tiraahdaa, waaba illaabay, waxay tiraahdaa waa dheemiday. Dheemidda caashaan waa marka ay bahasha aad isu taagin, ma garaneysaa, oo ay siyaabo ay tahay, marka waxaa la yiraahdaa waa xubneeysatay, beertu way xubnaysatay, Xubneygaa ay xubnaysatay baa waxaa la yiraahdaa: ha la geed-qaado. Waa inta yacni marka ay soo balqisho yaa la yiraahdaa ha la geed-qado oo waxaa la yiraahdaa baxdinkeedaas dhinac celisa ama ciid celisa waa inay hoosta bannaaan tahay. Saas baa hadba loogu dhufanayaa, baahasha loogu dhufanayaa, ayaa yaambada loogu dhufanayaa oo saa loogu balbalinayaa, si calaashaan aynan u joogsanin oo gallaydaasu aynan meesha ugu noqonin. Waa xubneysatay. Balkii baa markaa baxaya, iyadii baa baxaysa. Markaa ay baxdo waxay yeelanaysaa, goortay aad u dheeraato, sabuul.

Sabuulkaas waxa weeye kii aynu aragnay oo aynu wada cunnay oo si walba u cunnay, marna aynu cayriin ku cunno marna biseyl aynu ku cunno. Waa kow. Markaas laga gooyo sabuulka, oo si kastaba ha loo cunee, waxaa ku hara xubnihii baa geedka ku hara markaas xubnahaas ka hara waa la soo goostaa oo wixii bal ah ka hara waxaa la siistaa xoolaha la dhaqo oo uu ka mid yahay geela, lo'da iyo dameeraha iyo waxaas oo dhan baa la siistaa, xitaa xubnaha waa laysugu googooyaa inta laysku daro bahalka kan la yiraahdo, muxuu ahaa, laga reebo haddii Allah idmayo ee sisinta laga reebo oo maakaalaha la yiraahdo iyo iyadaa laysku qasaa markaas qasniinkaas la qaso xoogaa biyo ah lagu kordhiyaa markaas baa la siiyaa xoolaha dadkuna miruhuu cunaa. Mirahaas uu cuno yaa marna waxaa loo cunaa sidii horaba aan u sheegnay cayriin marna bisayl baa lagu cunaa. Markaas finjil, ha la finjilaa la yiraahdaa bahasha, markaas sabuulkii ayaamo la dado kii la soo dubtay ma ahaa ee yaa la finjilaa oo uu ka engegay balkii dusha ka saarnaa. Balkaas xoolahaa la siiynayaa, isagaaba mirahii laga gurayaa, waa la finjilay baa la yiraahdaa, markaasbaa la warayaa. Warniinkaa haddii aan la warin oo aan la engejin oo maqaasiin laga buuxsho ama god ha lagu rido ama maqaasiin ha lagu rido ee waa madoobaanayaa oo waa xumaanayaa, dhadhan yeelan maayo oo lamana cuno. Hase ahaatee kaa la engejiyay ee la wanaajinayey ee lagu soo tabcay ayaa la cunaa. Dabadeed aynu nimaanno marka mirihii oo inoo bisil oo inoo engegay oo markaas sameyn u baahan aynu u nimaadno. Mirihii marka ruuxoodii waxa loo cunaa dhawr nooc. Qaar waxay yiraahdaan aan cambuuleysanno oo waa la solaa, way dildillaacaan, saliid yar baa lagu waxeeyaa, daawaa la soo qaadaa, marka daawadaa la soo qaado qaarkood inta la qaadaa baa camuud daawadaa lagu waxeeyaa iyadiina dab baa lagu shidaa oo hoostaa lagaga soo shidaa, marka iyadii baa dildillacaysa. Mid baa waxaa la sameeyaa inta daawaha la soo qaado yaa saliid lagu daraa, saliiddaa lagu daro yaa markii dabka lagu shido qaarna dildillaacaan qaarna sidoodii u madooboo bal iyagana saasaa loo cunaa oo marka weli cudurrada iyo waxaas layska sanceynayaa badiba iyo marka la sacaadanayaa baa saas loo sameeyaa, midna cuntaa laga dhigtaa oo waa marka ay arabaqiyoowdo yaa qolada galbeedna shuuro yiraahdaan markaa, koonfurtana waxay tiraahdaa soor. Marka soorta sidee loo samaynayaa: waa la tumayaa, galkaa u korreeyo yaa ka dhacaya, iniintii baa soo hadhaysa. Iniintaa soo hadha qolana waxay tiraahdaa, caashaan, marka la garaaco (tumo) yay waxay u kala baxaysaa budo iyo jariir. Budadii goonni ayaa loo waxaynayaa, jariirtiina goonni ayaa loo waxaynayaa. Marka jariirtaas caashaan biyo lagu rido oo saas loo hagaajiyo yaa la karinayaa, budadii baa hadda lagu darayaa markaas waana la shiidayaa. Taas waa tan soorta loo cunaa. Waa kow. Si kalaa misna loo sameeyaa iyadoo aan laga dhigin oo aan jariir iyo budo loo kala soocin yaa gebigeedba maxdin la marshaa. Maxdinkaa marka la marsho biyaa lagu ridaa. Biyahaa marka lagu rido waxaa soo baxaya firid yay noqonaysaa wax firid ah. Firinkaa ay firindho oo biyo la kariyay sida xuukada geela ayey noqonaysaa marka la kariyo hadhawto. Waa kow. Midana, caashaan waxaa la qaadaa iyadoo laga dhigay soor yaa lagu darsadaa cuntada oo hilib yar oo maraq ahaa lagu sameeyaa.

Maraqaas marka laga saarane, oo caano lagu daraa caanahaasina marka nooc kastaba ha ahaadaane markaasaa waxaa la yiraahdaa “waa darbinayaa”. Bulshada ayaa isugu faanta. Anigu beerta gallayda ah intaas ayaan kaga harayaa Axmed Nuurow.

Axmed Nuur: Maanta waxay ila tahay saacaddii bayni joognaa odayaashuna waa la daallanyahay. Gallayda waxaan u dayn doonaa oo aan ku sii noqon doonaa sida loo kala yaqaan iyada iyo badarkaba waan is-barbar dhigi doonnaa wayna wada hadli doonnaa. Waxyaabaha ay faa’idada u leedahay illaa aynu xeerada ka dhamayno, xeerada soomaaliyeed ay ka dhamaato waynu ka hadli doonnaa. Halkaa innoogu jooji maanta.

***

Axmed Nuur: Meeshii buu ka sii soconayaa, odayaashu waxay ka doodi doonaan dhirta miraha bixiso, weliba gaar ahaan dhirta la beerto oo aad iyo aad u faa’iidada badan. Odayaasha ka doodaya waxaa ka mid ah Daahir Af Qarshe, Cali Mudiir, Cabdi Dhega Weyne, Salaad. Waxaa qaybinaya Axmed Nuur.
Haddaba odayaalow maalin dhawayto waxay inoo joogtay gallayda oo uu ka hadlay Fiqi Buraale, si wanaagsanna wuu uga hadlay. Haddaba maanta gallayda ayaynu sii wadi doonnaa. Intaanan gallayda u dhiibin ragga warka doodda ka qaybgelidoona ayaan waxaan soo bandhigayaa erayno dhirtaynu maanta ka hadli doonno gallayda kow oo aynu ku noqondoonno, masaggada, badarka, haruurka, qasabka, muuska, lawska, canabka, canuuniga, geedkaan la yiraahdo naarajiinta ama qumbaha, sisinta. Bal maanta intaasaan isku dayi doonnaa ee haddaba waxaa jirta in maalin dhawayd laga hadlay aynu ku noqnoqonnay oo si fiicanna looga hadlay iyadana ay borsanti tahay horta bal gallayda iyo haruurka siday u baxaan waa isu dhaw yihiin haddana ee waxaan weydiisanayaa Daahir Af Qarshe inuu noo kala guro ee gallaydu marka la abuuro illaa intay caloosha ka tagto, inta ay marto oo ay soomaalidu mariso oo ay ku jirto gallayda sida ay u baxdo iyo goorta la gooyo io goorta ay baxdo, siday u baxdo iyo meelaha ay ka baxdo iyo waxa ay tahay iyo inta ay u kala qaybsanto iyo magacyada ay leedahay, sida loo yaqaan. Waa kow. Waxaa kaleeto oo aan rabnaa oo lagama maarmaan ah inaynu ogaanno ee gallayda sida loo kariyo, sida loo cuno, xeerarka ay u abuuranto, sida xeeradaasu tahay waxyaabaha intay xeerada gelin sida loo qaldo. Waxaan rajeynaynaa inuu Daahir Af Qarshe ugu horreeyo ragga. Daahirow bal su’aashayda ah gallayda abuurkeeda illaa ay xeerada ka gasho.

Daahir Af-Qarshe: Waad mahadsantahay. Gallayda iyo haruurka si baa loo wada abuuraa markooda hore, marka ay baxaan bay xoogaa kala bayrayaan. Waxaa loo abuuraa: dhulka oo abaar ah waa lagu ridaa, dhulka oo raystay oo roob leh oo rays ahna waa lagu abuuraa, midkii la doono. Marka aan aaladatan fiican lagu abuuraynin ee leen-leenka loo abuurayo ee xagab xagab tan aaladda dawlada ah aan la haysanin dadna waa sayraayoo carrada uun buu ku rogaa dadna marka aan saas oo kale haysanin god yar buu duleeliyaa oo markaas buu ku ridaa oo gacanta ayuu ku shinideeyaa. Bal markaa dabadeed aalad ugu horreysaa waa taa

gacanta ee aynu fagno godka yar ee aad daloolisay oo aan in wyn daloolinoo oo xoogaa yar oo miiga ah aad ku dhufatid waxaa lagu ridaa saddex xabadood lagama badiyo mid keliyana laguma rido. Waa cili ay iska leedahay, waxaa looga jeedaa, haddii aad mid qura aad ku riddo oo midkii ba'o ama quraanyaba la baxdo ama wuxuuni ama dabagaallaba, meesha waad khasaarowaysaa. Saddex baa lagu ridaa. Marka ay dabadeedna ay soo baxdo dee, sidaa la sheegay ay noqoto, laba dhegood ay soo bixiso oo dillaacdo, dadka qaarbaa magac u yaqaanno oo Galbeed looga yaqaanno biqil, oo ay soo yara korodho oo la yiraahdo afar-dhegood sida gargarrada oo kale afar dhegood ay bixiso oo ay soo yara korodho oo markaa aad dibadda ka joogto beertii oo dhan geedo kaaga muuqdaan, waxaa la yiraahdaa carra-qaris oo camuuddii baa daboolantay oo geedihii baa kuu muuqdeen oo sirmay. Carra-qaris baa la yiraahdaa. Markaasay dabadeed soo baxday, markay xoogaa soo yar baxdo in doora yar la ekaatana, luun baa la yiraahdaa. Luuntaasu marka ay halkaa joogto oo geedku uu yara adkaado yaa laba laadood la bixiyaa halkii aad saddexda aad ku abuurtay. Haddaad sidoodii u dayso waa is gubayaan oo saddex laamood oo laciif ah yaa soo baxaya. Tan ugu xoogga roon leh ayaa la reebaa labana waa la jaraa. Markaasaa ninkii, dabadeed, sidaa beertii u dhex-qaadayaa. Muddo yar marka ay joogto, galbeed waxaa laga yiraahdaa harare. Markaa weeye marka geedaha laga gurayaa. Haddii aad geedahaan u dayso, geedahaasaa gubaya oo beertiiba il la saari maayo. Haddii aad heli karto dibi waa la dhex mariyaa, haddii aad dibi weydana gacantaadaaad ku xagaafaysaa. Waxaa la doonayaa geedka xididkii in loo banneeyaa, geedka kale ee biyaha ka cabbayaa in laga gooyaa, in dabadeed haruurka ama arabiqida oo qurihi meesha ay ku soo hadhaa oo dhirta kale lagala dagaallamaa. Haddii aad sidaa yeelin oo iska abuurto oo iska dayso, dabadeed, iyaduna waa ku deysay oo waxba kaaga bixi maayaan. Markaa dabadeed siday horta u soo baxdaa sidaa weeye. Kolkay weynaato waa xubnaysatay baa la yiraahdaa, waa laysku wada waafaqsan yahay. Kolka kale, dabadeed, way guureysatay baa la yiraahdaa; kolka dambe, cal-ku-hays baa la yiraahdaa; kolka dambe, way dhasay baa la yiraahdaa. Mid waa la quwaaxsadaayoo geedka la quwaaxsado ee geedka goolka ah weeye. Halkaan waxaan ka maqlayay, dabadeed markay laanta soo baxdo waa la wada quwaaxsadaa. Geedka dhalaya lama quwaaxsado oo hal dhashay ama sac dhalay ama lax dhashay oo aad qowracday weeye, lama qalo kuwaas oo caynkaas camal ah. Geed gooni u baxay oo gool ah baad arkaysaa oo iska sii baacayoo xubnihiisu ay xoog weynyihiinoo oo aan dhaleynin oo dhalma dhaafay markaa da'dii oo xubna waawayn. Gool baa la yiraahdaayoo waa kaa kan sonkorta laga shiido oo kale macaankana kala mid ahi, dadkana wax fitamiin oo geedkaa ka badiyaa ma uu jiro ninkii ku lixaadsado oo dadka dabadeed quwaaxaa waa uu cunaa. Mar haddaynu niyo u yeelanno si kastaba ha loo cunee waa dhereg un. Ninkii beer ugu baxdaa isagu horta gaajo waa daysay. Kolka ay dhasho way caaneysay baa la yiraahdaayoo markaa saa, dabadeed, caano ku soo joogsadaan. Kolkaa ninka beerta lihi wuu iska cunayaa. Siduu u cunayaa, weli way cayriintahayoo iyadoo geedkii laga soo gooyay lama cunee, haddii aynu nahay innagu reer daraawiisheed, dunsar baa la oran jirayoo markaas dabadeed

sabuulkii oo soo dhacay ayuun baa meel raran ah la geliyo camuuddaas uun baa lagu rogaa. Taas waa bisleyneysaa, macaankeeda layskama qabankaro waa lagu qaalalyoodaa. Arabiqiduna waa la mid oo iyaduna saas oo kale ayaa loo cunaa. Quwaaxii oo dhan baad ka cuneysaa. Geedkaa aad cuntay balkiisa iyo wixiisa xoolihii baad daaqa iyo wixii oo dhan wada cunayaan. Dad iyo duunyaba waa dhereg mar haday halkaa gaadho. Dabadeed waxaa imanaysa, haddaan ku noqdo, geedkii la oran jiray baaq-baaqa. Dhawr goor baa la baaq-baaqaa geedka. Mar baad dibi ku sii daynaysaa markaas buu bartanka kaga joogsanayaa, markaa irsigiina waa roganaysaa oo saas bay u wada seexaneysaa. Markaasaad oranaysaa “war caano wwaayahan ee hadhaw is caydheynaya ee sidee buu yeelayaa”. Bal Ilaahay maqaadiirtiisa waxaad arkaysaa wixiiyoo xidid qura haray geedka ku haysato iyada oo dhacday, haddana habeenkii toostay oo dabadeed geedkii baxayoo samadaa la ekaaday, neecawda gashay ama rayska loo banneeyay oo dabadeed laga neefiyay iyo xididdadii dhulka haystay la banneeyay baa waxaas oo dhan dabadeed faa’idadiisu ay tahay. Marka dabadeed, xoolaha sida loo dhaqaaleeyo ayaa la doonayaa in beertana loo dhaqaaleeyo cilmina loo leeyahay loogana shaqeeyo. Ninkii lahayn beero dabadeed waa dhergayaa. Cudurro badan oo ay qaaddaa baa jira ee cudurrada ay qaaddo waxaa ugu daran geedka la yiraahdo ashaambul. “*Abuur la hubaa ashaambul galay ee Ilaah amarkiis weeye*”. Markay ku war geyneeyno, haddaynu daraawiish ahayn, oo dawana waynaan haysaninoo geed uun baa bal Ilaahay maqaadiirtiisa, midkii uun aad ku riddo uun baa xubintii waxaa raacaya wax madow ah oo illaa baarka ugu baxaya. Mid nooc kale oo marabshaxar la yiraahdana wuu jiraa. Labadaa cudurba waa qatar. Sidii beerta u baxaysay mar marqabo iskaga dhacana waxaa la yiraahdaa iyadana haamaday oo mar qura bay qallaleysaa beertii gebigeedba habeenkii dhaxani ku dhacdo oo qabow. Saddexdaa cudurbaa dabadeed beertu waa qaadaayoo waxyaabaha qatarka ah weeye. Sideeda kale wax waliba waa cunaanoo wixii bahal hoose ah iyo wixii bahal sare ah iyo wixii xoolo ah iyo laacaa iyo udgoonkaa iyo rayskaa iyo wax waliba markay arkaan yay ku soo wada qaadanayaan aasaar. Marka habeen iyo dharaarba waxay doonayaan dad ama duunyaba in lagaga tabco. Goyntii baa timid. Markii la gooyay waa la aaseeynayaa mid baa la yiraahdaa. Marka meeshii layskugu gooyo qoryihii iyo mirihii iyo wax walba ayaa la aasaynayaa dabadeed waxay noqonayaan buur oo kale. Hadda waa la tumayaa. Tumiddaas waxay dooneysaa rag xoog leh. Galbeed waxaa laga yiraahdaa guud. Guudkaa haruurkii oo la tumay baa dabadeedna buur oo kale isagoo ah ayaa dabadeed rag dhallinyaro ah oo xoog leh oo ulo meel ka yara liicsan oo madaxoodu siman yahay oo yar qallooca wato midba uun loo sameeyay oo meel ku qarsadana le yaa labaatan labaatan ama toban toban yaaba ragga ugu soo fuulayaa buurka meel. Waxay ismarinayaan xaraar ama malaas ama darro, qofba siduu u yaqaanno. Xajiinteedaasaa qatar ah oo raggu dabadeed waxaas iska marinayaa. Haweenkiina, dabadeed, sharafta lahaa waa imanayaan ee raggaa cuntada u sameynayey maalintaasu meeshaas diyaaqad weyn weeye. Ninka dhallinyarada ee bahalkaa tumi yaqaanna ee dabadeed doonaya halkaas inay ka cilaaqato, hablihii halkaas ka mashxaradayaan oo

halkaas bay ka eegayaan oo ninkaasi wanaagsan u tumi og ama, ma aragtay, bahasha labada barbar usha ka rogaaya ee ninkaa xiga intaa u jira aan ushiisu taabanaynin, ham, ham, ham oo hamtaa hayso oo hadhawto ay ku laaqinaayaan, heey, kolka ma aragtay, raggu ay ka joogsato. Wax uun layska garaacayo oo layska tumayo ma aha ee cilmi bay ku soconaysaa. Markaas bay iyadana halkaas ka arkaysaa ninkaas xooggiisa iyo sida uu hannaanka u yaqaanno iyo inuu nin wax yaqaanno, Laa Ilaaha IllaalLaahu, Maxamedkii la doortayow, markaa dabadeed meeshii bay horta sharaf joogtaa halkaa layskugu yimid iyo barwaaqada weeye rag iyo haweenba layskugu soo baxay ee cunnadii iyo waxaa lagu cunay, dabadeedna, wakaa gabdhaha reerkooda halkaasay ka arkayaan ninka wax taraya ee xoogga leh ee farsamo yaqaanka ah oo aan gabdhaha loogu diidi karayn hal mid mooyee mid walbaa la siin maayo duufla ah ninka ragga halkaas buu ka soo baxayaa ququs baa la yiraahdaa, dabadeed markaasaa mirihii oo halkaas ah oo la tumay oo cufkii halka kan loo tuuray wixii kalana, dabadeed, halkaa uun cabbeynaya, markaa dabadeed haruurkii sida horta bahalkan looga shaqeeyaa saa weeye. Marka dabadeed la beerayey ee hore dadka wanaagsan ee isku xirani ee hawl iyo hanti wadaagga ahi, sida halkeeynaan ee laga doonayo oo kale, iyadana waxaa la yiraahdaa guus. Maalintii la qodayey weeye oo nin waliba wuxuu keenayaa labadiisii dibi iyo harqoodkii oo ku xiran iyo dullihii oo wata isagoo gurigiisii wax ka soo cunay. Markaasaa dabadeed gerka loo gelinayaa oo lays wada caawinayaa. Waa laysku xiran yahay oo dabadeed maalinta dambana waa la wada tumayaa, maalinta horana waa la wada jeexay dhulka. Haddaad sidaas oo kale iskaashatadaa ahayna, horta waxaaba la yiraahdaa beer lamaba wadi karo hadday qof kale oo qura qirsato wax micna leh ma aha. Markaa waxaa lagu leeyahay beerta inaad ka adagtahay weeye ee inay kaa adkaato ma aha. Maxay u jeedaan inaad ka adkaato, haddaadan dadka caynkaas oo kale ah aad haysan, in yar adigu qodo weeye, ha hambad weynaan, yay kaa baabi’in markaas, illaa itaal ma hayside, haddaase u haysato dad iskaashato ah oo guudkaasna ah oo hadhawna kula gooya marka horana kula qodaya, kula xannaaneeya marka la harabeynayo oo dibidaas oo dhan la dhex marinayo. Cilmigaas horta waa iskaashato gebigeedba. Haruur si kale iyo arabiqi laguma beeri karo, marka dabadeed haddii la gooyo mar ee hadday jawaankii gasho oo haweeneydii lahayd loo dhigo aqalka dee barbarkiisa mid iskaba raseeysanoo saqaraa la yiraahdaa dee aqalka xeerkiisaase. Balkii iyo haruurkii iyo wixii loo geeyay oo lo’du iyo labadii dibi iyo bubta ay halkaa ugu xiran yihiin oo mid isaga sabuulka iskaga jira ay marba ka soo qaadato saqarada halkaa aan sheegnay ee ma aragtay dad reer miyigana qol-qol buu yiraahdaaye, halka qol-qolka reer miyiga ka yiraahdo saqaradiiba hadday ka soo qaadato marba sabuulo waaweyn oo ay ku sukusho mooyaheeda hadday quriskeedii oo dhami waa bisilyahay sacuna halkaan buu ku xiran yahay, balkii uun bay u doontay weesha uun bay ka xirtoo dabadeedna caanaheeda halkan ka dhigatay kolkaasay haantii luleysaa haruubkiina noon nooc uun bay u samaynaysaa. Qoyskaasuna waa qoys Ilaahay gacantiisa wax geliyay quurina uumaayo. Horta dhulkii sida horta wax loo tabcaa sidaa weeye. Markaa gabadhii waxay dooneysaa ninkii meelahaas u yar warwareega

oo dabadeedna sidaas uun bay ka war hayaan illeyn mar haddii beertii la gooyay sida hawshii ka dhacday oo waa xilli uu nasanayey isaguna ee reerka laga wada shaqeynayey. Haddana kariska aan u immaado. Anigu si kalaan u aqaannaa haruurka haddii laga rido isha oo isaga oo sidiisa ah la kariyo, dad garaw buu u yaqaannaa, annagu haddaan reer daraawiish nahay horta kaa garaw uma naqaanno. Kaa waxaan u naqaannaa markuu isha leeyahay koronkor, marka baalka laga riday, isaga oo cad la kariyo oo mirihiisii waaweynyihiinna garaw baanu u naqaannaa, marka la jebiyana waxaan u naqaannaa jiriir, marka budadiisa lagu darana ee uu isku bislaado ee la yiri "*Muruuruqiyaay maraariqiyaay, majiirka miyaadan garanaynin*" ee dheriga lagu kariyo ee la adkeeyo, illaa digsi wax lagu karsado ma aha ee, dee xeero weyn oo dabadeed afar nin qaadi karto dabadeed halkaa loo dhigo martida sharafta leh ee dhexdiisa dabadeedna baaquli wayn lagu shubo oo sixin lo'aad oo guduudan xoogaa yar oo geedo adari ahna sidaa loogu yara daadiyo, oo kiiyoo adag nin waliba intuu mar halkaa ka goosto oo subagana daro waxa aynu haysanno waynaan war u hayn mooyee dunidaba ma haysato cunno taa ka korreysana maba jirto. Bariiskan baa xoogaa lagu daayay iyo yaanyada halkaan la soo dhigayo iyo maraqan yar ee guduudan iyo qusladan hilibka la korsaarayo iyo waxaan aad arkayso wax macna ku fadhiya ma aha mid haruur la siiyay oo si wanaagsan u kariyay oo subag xoolihiisa ka soo lisay oo dabadeed halkaa dhex-dhexaadka ah kaga shubay, kaas baa cunno haysta baan anigu leeyahay. Ee waxaad mooddaa haddaynu soomaali nahay wixii dhiba inaynaan fahminba oo halkaa ka dhuquna calooshana ay ballaarato wax laga dhergana haruur uun baa jira ama caano yaa caloosha buuxin kara ee waxaan kale gaajaday bi'iyaan maahine calool ma buuxiyaan. Markaa dabadeed, waa in labadaa tartanba ku baxaan oo dabadeed ay calooshaadu faaxdo oo dabadeedna mar walba ay quwad geliyaan. Sidaas weeye. Laa ilaaha illaLlaahu, Maxamedkii la doortayoow, haruur iyo arabiqi wax laga sheekeyn karo waa ay dhaafeen. Sida kale labadaba waa la saloolaa oo waa lagu ducaystaa. Gurigii labadaas u baxaan, haruurka iyo arabiqidu, gaajo way ka tagtay. Si kale haddaynu u qaadanno, haruurku wuxuu dawo ku leeyahay iyo arabiqida iyo digirtu, iyo sarraynku, saddexdaa baalka leh, afartaa baalka leh, yaa haddii sidooda loo kariyo, caloosha ka soo noqda. Cunno oo dhan, dunida oo dhan haddii laysu wadageeyo, waxaan caanaha xoolahayna ahayn oo caloosha ka soo noqda afartaa uun baa jira. Iyadana bal qora, yay cayaar idinla noqonine. Marka afartooda mid walba in sidiisa loo kariyo weeye, haddii baalka laga tuuro afartooda midba, dawo ma leh. Habeenkii ninkii ku casheeyo arabiqi baalkeedii leh, subixii musqushuu ka hor tagayaa, haruurka oo baalkiisii lehna isna waa kadaalik. Digirta oo sideedii loo kariyana waa kadaalik, sarreenka ramadaanka la cuno waa adigan arkay habeenku markaad ku saxuurato subaxii baad la ordaysaa oo wax allaale iyo wixii calooshaada ku jiray, Afartaa baalka lehba innagay inoo baxaan. Si kale wax kuma taraan ee saas bay wax ku taraan. Waxayna dib ha loogu noqdo oo ha la barto sida ay faa'iidada ku leeyihiin ha la ogaado. Waxaan wax dhammaanayaa ma aha, bal anigu waan xiiqay ee adiga lee waaye.

Axmed Nuur

Horta waxaan moodi jiray, aniga wiil mara cadiba, gabar baa waxay tiri "*Waxaan moodi jiray wiil mara cadiba inuu mara-gud yahay*". Markaasaa wiilkiina wuxuu yiri "*Waxaan moodi jiray gabar tima dabniba inay nin doon tahay*". Horta anigu waxaan moodayey ninkaan la yiraahdo Daahir Af Qarshe inuu geel-jir yahay, laakiin maanta yuu iska tirtiray, geel-jirnimadii yuu xagga dhigtay oo maantuu beerihii u soo dhigtay oo waxaad mooddaa qabiir saraaci ah oo beeraha yaqaan baad mooddaa horta sidaan moodi jiray waan ka baxay. Markii hore waxaan oran jiray "*War ninyahow geel-jirka ah*". Geel-jirnimadii aan ku cayn jiray maanta waan ka baxay oo waxaan leeyahay beer yaqaan weeye, reer beeraley baad tahay, geela waa lagugu hafray, ma aqaan waxa magacaa geel baas kugu daba xiray, horta geela isaga har, mar dambana ha ka hadlin oo Dhega Weyne iyo isaga daa. Waa kow. Waxaan u gudbayaa ninka la yiraahdo Cali Mudiir oo isagu reer beeraleey run ah, beerta aad u yaqaanno oo garanayo. Waxaan moodayaa inuu naga sii badiyo. Intaanan dadka kale u gudbin, Cali Midiirow adigalee weeye.

Cali Mudiir

Way adagtahay dowduucakan inaan qayb fiican oo muuqato ka qaato sababtu waxaa weeye af-garoocna waan ahay oo kula tartami maayo ooratoorannimada odayaasha. Inkastoo aan beeraha aad ugu aqoon badnaan lahaa haddana awood waxaynan isiinaynin habka caynkaas ah inaan u hadlo. Haddii lay waydiin lahaayoo oo waxaas maxaad u taqaan oo tartiib tartiib lay waydiin lahaa waxaa laga yaabi lahaa inaan wax badan aqoon lahaa, laakiin awoodaydu inaan mowduuc intaan iska qabsado saas u hadlo, way igu hee adagtahay. Haddii aan mowduuca u soo noqdo, tan iyo markii bani'aadamku billaabay beerashada shaqadana ay u qaybsantayoo xagga raacashada iyo xagga beeraha iyo xagga farsamada ay u qaybsantay, ee illaa muddadaas xagga beerashadu waa ay kordhaysay oo waa ay kobcaysay. Waa ay koraarysay oo marba heer bay soo martay, illaa ay ka timid waqtigaan cusub ee farsamada ee cilmiga lagu farsameeyo illaa uu ka gaaro, hasa yeeshee annagu tacabkayna beeraha ee isku-dhafan, maanta kii ugu dambeeyay iyo kii ugu horreeyaba la socda haddaynu...waynu ka sheekayneynaa niraahno waxaad mooddaa inay aad u adagtahay. Marka mowduucyadooda iyo hadalkooda waa is-dhexgalayaa. Kii cusbaa, farsamadii cusbayd ama aqoontii cusbayd iyo kii hore yaa iska kay dhe-gelaya. Marka haddii aan ku billaabo beerta, marka ugu horreysa waan carrageddinnaa, waan afuunjinnaa, waynu diyaarinnaa, geed-qaad baynu ku sameynaa ka dibna waxaa loo gudbaa beertii in la abuuro. Abuurka waxaa la yiraahdaa lun-cad iuo lun-gaduud. Lun-cad waxaa weeye marka aan roobku imaanin. Marka roobku yimaado ka bacdina waxaa la yiraahdaa lum-gaduud. Oo waxaa la yiraahdaa lun-gaduudow lun-cad kaa roon. Marka beerta ay soo dhalato, heerba mar bay joogtaa sideedaba shaqadu. Waxaa la yiraahdaa shaqo bulshadeed oo tan diyaarinta beerta laga billaabo illaa ruuxu uu muufada ka cuno hawlo badan bay soo martaa oo shaqo badan bay soo martaa, magacyo badan bay leedahay oo laga gaaraynin. Haddii aynu soo billawno beerta la hanfuujiyo oo la carrageddiyo, lalimo la abuuro soo dhalato ay noqoto laba-dhegood illaa ay keento sabuulka, midba magac baa loo yaqaannaa. Sabuulka,

markay bislaato, wwa la alkuudaa, saaxiibkey meeshii u ka lahaa guus, goob iyo alkuud iyo waxasaynu niraahnaa. Waa laysla goobiyaa. Ciidan badan oo rag iyo haween lahaa ayaa sameeya. Iimada nafsaddeeda waa la goobiyaa, abuuridda waa la goobiyaa, tumidda ama subcidda waa la goobiyaa oo ciidan baa ka qaybgala. Diyaarinta badarka ee godka la geliyo ama la yiraahdo ee muxuu ahaa, maxaa la dhihi jiray, beerta midka godka la geliyo, bakaarta la geliyo. Illaa hawlahaas oo dhan waa laysla qayb galaa oo waa runtiisa oo hawsha haddaan laysla qaban ma fiicna. Marka badarka sida loo cuno iyo habka loo cuno iyo sida loo sameeyo noocyo badan bay noo leedahay. Diirtu noocyo badan bay leedahay. Kama gaari karaayo oo heerar badan amba loo tabco amba magacyo ay leedahay amba sida loo cuno waa ay badantahay. Masaggada sidoo kale, gallayda sidoo kaleeto, aad bay magacyo badan u leedahay laakiin magacyadaas marba heer kala joogo in laga sheekeeyo oo midba waqtigiisa laga sheekeeyo waqti badan bay qaadaneysaa, saas daraadeed dooni maayo inaan ku dheeraado, hase yeeshee haddii mid mid lay waydiin lahaa ama aan isu weydiin lahayn waxaa laga yaabi lahaa kaa maxaad u taqaan, markay heerkaas joogto maxaad u taqaan. Haddii aan si kale u iraahdo koonfurta iyo waqooyiga matalan marka beeraha laga sheekeeynayo qolo la arkaba qoladay deriska la tahay ayaa kaljarkeeda ama magaceedu galaa. Reer koonfur haddaan nahay annagu sawaaxiliga ayaan deris la nahay oo Keenya. Afkeena waxaa ka buuxa xagga beeraha, sawaaxili baa ka buuxa, waxaa ka buuxa talyaani, magacyo badan baa ka buuxa oo afkeenaan galay xagga tacabka beeraha. Shaamba aan niraahnaayoo magacyadu beeray noo leedahayoo beer baan niraahnaayoo, iyaga, hadda erayada tan amba shini ah, ama arabiqi ah, amba baaq-baaq, amba biqil, magacyada noocaas ah waa galbeed. Galbeed markaan leennahay waxaa weeye dadka qodatada ah ee beeraha leh, laakiin daraawiishtu hadallo ay halkaa ka keeneen mooyee hadallo ay beeraha u leeyihiinba waa yar tahay. Xoogaa haddaan kaftan yar ku tuuro waayo waa geel-jir inkastoo uu saaxiibkey uu yiri geel-jirna ka tagtay, laakiin sidiisaba duqu waa abwaan da'na waa yahay. Maan ka cirrow iyo maja ka cirrow iyo madax ka cirrow oo dhan buu maray oo meel kastaba isagu wuu ku horreeyaayoo beerihii waa ku horreeyaa, xoolihii wuu ku horreeyaa, suugaantii waa ku horreeyaa, militerinnimadii waa ku horreeyaa oo askari duqoobay buu ahaan jiray. Dhaqanka gaalada iyo carabta waa yaqaannaa, kan galbeedka wuu yaqaannaa, koonfurtiina dhowr iyo toban sano buu joogaa oo waaba innaga badiyaa. Marka lama tartami kareyno sidiisaba, hase yeeshee haddii aan soo koobo erayo badan uu koonfur ku leeyahay beerta tacabkeeda ama masaggo ha ahaato, ama digir ha ahaato, ama gallayba ha ahaatee, waad leedahay waan aqaannaa laakiin waqtigu iima saamiximaayo, saan horay u sheegana, aniga af-garoocaan ahayoo aftahamadaas odayaashu ay leeyihiin ma lihi. Annagu dabeecad ahaan haddaan reer koonfur haddaan nahay, sideennaba, waa nalaga aftahansanyahayoo ninkii kaa aftahansanna dhaxalkii aabbahaa waa kula wadaagaa ama waa kaa qaadanaa baa la yiri. Waa ka baxay.

Axmed Nuur — Ninka la yiraahdo Cali Mudiir aad iyo aad baad u mahadsantahay.

Kaftan ahaan haddaan iraahdo nin baa soo maray, wuxuu sameeyay, marti buu wuxuu u sameyn jiray soddon muufo ayuu u sameyn jiray habeenka. Habeen walba soddon nin buu ku tala geli jiray. Habeenkii dambe buu wuxuu waayay, wax u yimaaday nin keliya, markaasuu aad iyo aad u farxay oo yiri "*Caawa ma soddon muufo baa kuu bisil, wax kaa cunaaya ma leh*". Soddon qof cunnadii uu ugu tala geli jiray baa u taal, nin kaliya baa habeenkii u soo martiyay. Martiduu jeclaan jiray oo nin aad iyo aad deeqsi u ah buu ahaa. Marka ninkii u yimid buu yiri "*Ninyahaw aniga caawa aad iyo aad baan u liitaayoo haddee cunno aan soddon qof ugu tala galay baa ii bisil, meel aan geeyana ma hayo* (waagaana firintijeerro iyo meel cuntada lagu kaydiyo ma jirin)*, marka xaajada waa xuntahay caawa*". Marka ninkii baa wuxuu yiri "*Haddee aniga ruuxayga waan jiranahayoo calooshaa layga hayaa oo aad iyo aad baa anigana calooshaa layga hayaa"*. Markaas buu wuxuu yiri "*Bal ii keena muufada inta aan cuni karo anigaa caawa isku dayaayee inaan muufada oo dhan cunee, ha la ii keeno muufadii oo dhan*". Soddonkii buu ninkii cunay. Markii uu soddonkii cunay ayaa ninkii u yimid, mise weli ninka cunnadii buu cunayaa, markaas buu ku yiri "*Waryaa heedhe, adiga yaa kula cunay cunnada? Ma kaligaa baa cunay*?"

*"Haa, kaligaygaa cunay*" buu yiri. Wax yar bay is-wareysteen oo wuxuu yiri "*Galabta halkeed u socotaa*?"

"*Calooshaan ka jirranahay oo, cunnadii baan cuni waayoo nin dhakhtar ah oo xagga lagu sheegay baan u socdaayoo...*" waxaasuu u sheegay. Haddee saas buu ugu jawaabay. Markaas buu wuxuu yiri "*Walaaloow waxaan kaa baryayaa in aadan i soo marin markii aad isa soo daweyso oo ninka dhakhtarka ah aad u tagto, ha i soo marin, maxaa jira muufadii aan soddonka nin ugu tala galay baad kaligaaga cuntay*". Horta cali Mudiiroow ma qaan waxbaa iga xun oo ma aqaanni oo laakiin sidaad uga hadashay si yaab leh bay ahayd waadna ku mahadsantahay inkastoo Daahir Af Qarshe uu yahay "libareeri" socda oo isagu wax walba inoo buuxinaayo, haddana adigu si yaab leh baad ugu hadashay kollay anigu kama aan hadlin odayaashaan u gudbayaa, salaad baan u gudbayaa. Salaadoow adigana weli masaggadii kama dhergin. Haye Salaad.

Salaad — Mahadanid Axmed Nuuroow. Horta gallayda wixii aan anigu ka aqaan baan ka taabanayaa in kastoo aan anigu aad u beeray yaa haddana aad iiga dheeraysaan, waxaan keenayaa waa iga aftahamo badan tihiin, laakiin anigu waan beeray oo in badan baan beeray. Aan beero, anigiyoo aad moodday in aan beeray an arkayo, ayaad waxaad mooddaa in aad iiga aftahansantihiin oo aad iiga horraysaan, haddana waayo aniga hadalkii oo beertii yaa in badan iga lumaysaa, idinkana waxaad mooddaa inaysan idinka dhumihayn. Horta marka ugu horreysa bahashaan la dhaho gallayda iyo masaggada, sida aad ogsoon tihiin waa laba jaad. Waa sida Daahir u sheegay, uu abwaankaas u sheegay, waana hee kala duwan yihiin, waana iskumid. Meel waa isaga mid. Markaa bixiddoodu ama waa roob ama waa webi labadooda. Labadaasba waa ku baxaan oo taas waa iska shaabbahaan, laakiin bixiddii waa kala duwan yihiin oo, waxay ku kala duwan yihiin ama yacni goyntii bay kala horreeyaan oo goyntii masaggada yaa mar walba adag oo masaggada ayaa dambeynaysa.

Gallayda mar kasta xilligii waa ka soo go'daa masaggada oo waxaa soo horgo'a gallayda. Haddana falliinkoodii waa kala duwan yahay. Midna, sida annagu aan u naqaan, midda koonfureed ayaan idiin sheegayaa ama, matalan, Shabeelle ka soo qaad. Midna saddex goor baa la falaa midna laba goor oo kaliya ayaa la falaa. Marka mid waliba, labadooda, markaay soo baxdo oo soo dhalato, mid waliba waxaa soo baxaysa laba dhegood. Labadaas dhegood hadday soo baxdo, cudurka marka ugu horraysa laga ilaaliyo waa bahal yar-yar oo dixri ah oo socsocda oona la yiraahdo diirato (kolley annagu reer koonfurka sidaasaan u naqaannaa, diirataa la yiraahdaa). Horta midkaasaa marka ugu horreysa laga ilaaliyaa. Marka haddana waa kala adag yihiin oo hadday xoogaa baxdo, laba dhegood oo kale ayaa ku darmaysa, haddana markaas laba kale ayaa ku sii darmaysa. Markaas oo ay weli xubno ay gaarinna, gallayda wax kasta hadday noqoto, diiratadaasi wax uma dhinto, laakiin masaggada hadday tahay, illaa ay saddex xubnood ka gaarto, bahashaas diiratada ah hadday mar gasho waa bes.
Waxaa jira isaguna cudur kale oo gala illaa iyo lafta dhuuxeeda. Labada waa galaa kaas oo waa u simanyahay. Ama sidii oo bulumbuluu u egyahay ama lafta oo keligeed ahaanba iska madoobaaneysaa. Markaas mid sabuul ku dhalaa jira. Sabuulka uu dhalaa xitaa waa naxuus oo wax roon ma jiro. Marka haddii daawada hadda la helay, oo daawadaan dambe la helay, waa ay jidhaa waagii hore waxyaallo badan yaa soomaalidu ku waxayn jirtay masaggada: geed oo la shido oo waad wada taqaanniin geedkan la yiraahdo eredka oo webiga oo kaliya ka baxa oo qodaxda leh yaa la shidi jiray. Haddi la shido waxaa lagu shubi jiray dambaskiisa yaa lagu shubi jiray haddii beertaas sannadaas uu bahalkaasi galo, diiratada ahi. Ama waxaa la yeelaa inta aan beerta la abuurin oo aan lun-cad iyo lun-guduud iyo lunge loo kala abuurin, yaa beerta oo dhan waxaa lagu shubaa dambaskaas kulligeed. Waa sannada dhawayd midkuu galay. Hadduusan gelin muraha, waa layska beeraa oo ama lun-cad baa loo beeraa ama lun-gaduud baa loo beeraa. Lun-cad iyo lun-gaduud waa kala duwan yihiin. Lun-gaduudkana waa markii beerta ama roob helo oo ay qoyantahay ama markii webi lagu daayo ee ay qoyantahay. Lun-gaduud ban annagu niraahnaa. Marka ay beertu qallalantahay, waxaa loo yaqaan lun-cad. Markaa badarka waxaa la qodayaa marka lagu abuuraayo, god yar baa la qodayaa, waxba aan dheereyn, saddexdaas suruq ama yaambo ayaa lagu dhufanayaa marka aaladatan, sidii abwaankii Daahir ugu sheekeeyay oo kale, markii aan la helin oo aaladatan la helin, yaambaa la yiraahdaa, yaambadaasaa lagu dhufanayaa. Badarka saddex iyo afar iyo intaba waa lagu ridaa. Haddii lagu rido loo dayn mahayo si markii uu soo baxo intii farahaas oo kale markii uu soo baxo, waa la gurayaa. Waxaa laga gurayaa, muxuu ahaa, ama hal ama labo yaa loo daynayaa. Ugu badnaan labo ayaa loo reebayaa. Mar mar adiga, oo waxaa jira dadku saddex loo reebana waa jirtaa. Marka badarka saas baa loo kala gurayaa, ama masaggada ha ahaato ama gallayda ha ahaato. Haddana waa kala duwan tahay guriddoodii. Masaggada saddexdaas goor markii la falo waxay noqonaysaa, xubnay bixinaysaa, dhawr xubnood bay bixinaysaa. Xubnahaas markay bixiso wax la yiraahdo, labaduba, carrab dooraa la

yiraahdaa. Carrab dooro wax la yiraahdo oo waxay bixinaysaa faraqyo leh. Faraqyahaas dhexdooda xoogaa yar oo alkuud ah oo intaa oo kale ah ayaa ka dhalanaya. Geedkaas waa fidayaa. Marka masaggada iyo gallayda waa isku duubmaysaa, laakiin masaggadu fara saas ah ayay yeelanaysaa oo waa kala firaareysaa. Waxaa laga ilaalinayaa shimbirta. Waxaa laga dhex dhisayaa geed dheer oo geedkaa waa rako oo waa la fuulayaa. Jaranjar lagu fuuluu leeyahau. Jaranjartaas. Geed la yiraahdo waraf baa la qaadanayaa, dhagax baad soo aruursanaysaa. Geedkaas ama mid “bul” leh oo waxaa jira “bac” laga siinayo, Shimbirtu waa didaysaa markaa. Illaa beertii oo dhan ma kala gaartid, marka ama labo rako ama saddex rako ayaa laga dhex dhisayaa hadday beertu weyn tahay; hadday yar tahayna hal rako ayaa laga dhex dhisayaa markaa. Mid kale oo waxaa jira waraf la yiraahdo oo inta saas la yiraahdo, “fay” yiraahdo. Faydaasayba ka cararayaa iyada. Intaas baa rakaha loo fuulayaa, markii miruhu soo baxaan, ka horna iyada waxba ay ka cunto shimbirtu ma leh. Waa marka miruhu soo baxaa dabadeed. Marka ay bislaato, waa la goynayaa, meel baa laysugu geynayaa. Annagu afka koonfureed, midbaa laysu geeyay oo kulligeed laysu geeyay, alkuud baa la yiraahdaa. Magaceeda alkuud baa la yiraahdaa. Alkuudkaas baa laysu geeynayaa, maalin ka dambe waxaa isugu imaanaya dad badan baa isugu imaanaya, sidii abwaanka Daahir uu sheegay, ulihii uu sheegay, ulahaa caynkooda laftigooda waxoogaa xagal saas ah inay leeyihiin aad moodid, madaxana u buuran, yaa lala dhacayaa. Sumac baan niraahnaa. Markii sumacaas la sumco, masaggadii waxaa lagu shubayaa jawaan, ayaa lagu shubayaa. Midna waa mid la kaydsanayo oo god bakaar la yiraahdo ayaa lagu shubayaa,middaa jawaannada lagu shubay waxaa ka haraayo badar jajab iyo badarka geedkii laga gooyay. Balkii iyo qorigii dheeraa xagguu kuugu harayaa, waa la gurayaa, midkaas waa la gurayaa iyo ishiisa halkaasaa la dhigayaa, waagaa la yiraahdaa, lo’da baa la siinayaa, arigaa la siinayaa, geela oo waxaa la siinayaa beeraha yaqaan, baa la siinayaa. Waagaa la yiraahdaa kaa. Masaggadii midna godkaas baa lagu shubayaa, midna waxaa lagu shubayaa jawaannadaas. Dabadeed, marka dhawr caynbaa loo cunayaa. Anigu sidaan aqaan, dhawr nooc baa loo cunayaa. Mid iyadoo sideeda ah baa biyo lagu shubayaa oo la karinayaa, mar mar digir baa lagu darayaa. Digirtaas iyo iyada baa isku bislaanaya, cambuulaa la yiraahdaa, saliid baa lagu darayaa amaba subag baa lagu darayaa iyada oo qaloon ah. Midna qaloon baa la yiraahdaa oo ama digsi baa inta la qaato dufan lagu shubo oo digsiga dhulka la dhigo yay ku badbaysaa. Middaasna waa lagu Allah baryaa oo daango, baala cad, intaba waa la yiraahdaa. Marka ragga akhyaarta ah iyo odayaasha bunka cuno, waxaasaa la siiyaa, ee waa subaxa hore oo waa af-billaw. Mid waxaa la yeelaa oo soor baa la yiraahdaayoo waa la tumayaa oo xanshirta waa laga bixinayaa, buunshaan niraahnaa midda laga bixiyo oo xoolahaa la siiyaa oo iyaduna waa qaali oo waa la gadaayoo wax la xooro masaggada ma leh annaga agtayna, reer koonfuraynu nahay, halkaanaa la dhigayaa, jawaanaa lagu shubayaa, xoolahaa la siinayaa. Taa buunshaa la yiraahdaa. Haa, xanshina waa la yiraahdaa. Masaggadaa kuu soo hartay. Marka masaggada sidii Daahir u sheegay isaga af ma nihi. Annagu mid waxaan niraahnaa xaniin. Waxaa la

yiraahdaa kaligeed midda ina la jajabsho oo dudadii iyo waxaas laga reebay, xaniin baa la yiraahdaa oo kaligeed lagu shubo. Masaggada waxaa la yiraahdaa jariir baa la yiraahdaa, midna xaniin baa la yiraahdaayoo inta la kariyo yaa budadii oo halkan taal, markay bislaad ku dhowdahay, inta lagu soo dhawaado, qori oo la qoray inta lagu walaaqaa, saas lagu yiraahdaayoo (lagu daraa). Marka labadaba caano iyo hilib, iyo wixii la doono, lagu cunaa. Markaas soor wax la mid ah oo la cuno oo nin ragi kaga cayili ogyahay ma jirto. Mid kale iyadana ishaa laga saarayaa oo isha halkaasaa la dhigayaa oo waa kaligeed, waxbana lama jejebinayo. Qofka jaba, sida ay waxtar u leedahay, qofka jaba iyada ayaa lagu baaninayaa, subag baa loogu darayaa. Hilib la siin maayo qofka, caano la siin maayo, keligeed iyo subaggaas baa la siinayaa oo iyadana waxaa la yiraahdaa ilbixsi, baa la yiraahdaa, korokor waa la yiraahdaa. Toban magac bay adigu leedahay, kama aan gaaro haddase, ninkii ii sokeeya, inkastoo aan anigu sida raggiinnaan oo kale aftahan u ahayn, yacni hadalkana uu igu cusub yahay, waana layga aftahansanyahay, sidiinna oo kale kama aan gaaro, aftahan ma ihi. Annagu horta intaas masaggadaan u naqaan. Haa, gallayda iyadana haddaan u soo noqdo, gallaydu waa ka duwan tahay. Gallayda iyadu mar hadday baxdo, carrab doorada iyo bixido, ay xubnayso oo markaas ay baxdo (xibno xibnay u baxaysaa), markaas dambe waxay saaraysaa geed la yiraahdo buul, ayey saaraysaa. Geedkaa buulka ah hadday saarto, carrab-dooraa la yiraahdaa, carrab-doorahaa markay ka baxdo, sabuulkii baa ka soo dhex-baxaaya. Sabuulku sida masaggada bannaanka ma yaallo, qob dedan oo wuxuu leeyahay ila dedan. Marka iyada shimbir laga ilaalin maayo. Laba waxyaalood baa laga ilaaliyaa: mar mar, dhulka maroodiga leh, maroodiga waa laga ilaaliyaa; bahal inkaar qabta oo jeer la yiraahdo, habeenkii beerta gasha, iyadana waa laga ilaaliyaa; bahal ka sii daran oo kashiito la yiraahdo iyadana waa laga ilaaliyaa; doonfaar waa laga ilaashaa; daanyeerku wax saas ah natiijo ma sii laha, hal iyo labo ayuu gooynayaa; bahal ka sii inkaaran oo isagana la yiraahdo balanqal oo inta webiga leh dhan jooga iyada beertay gashaa horta waa beer ba'day, hal iyo labo uma gashee waxay u gashaa toban toban iyo toban iyo shan. Mar makoo hal iyo labo iyo waa layska arkaa (inta badnse) markay u yar tahay waxay u gashaa toban iyo shan. Bahalladaas ayaa iyadana (gallayda) laga ilaaliyaa. Marka iyadana sidii masaggadii oo kale yaa loo dhawrayaa, markii loo dhawro oo meeshii la alkuudo.

Axmed Nuur

Gallayda siday u baxdo iyo masaggada waan filaynay inaad sidaa uga hadlayso. Waxaa la yiri gabar faruuran oo niman axaa la yiri guumeeysooleey baa la yiri oo waa weynaatay. Markay weynaatay baa waxaa la yiri war gabadha aan u tagno oo meesha ay guur ka joogto aan weydiinno. Markaasa la yiri "*Hayeh, ee bal aan weydiinno*". Markaas maxaan weydiinnaa baa la yiri, markaasaa la yiri aan niraahno faruurooy wa lagu soo doonay. Markaasay dhaheen war faruuro. Aasay tiri "*Hiih*".
"*Nin baa ku soo doonay oo geel baa lagaa bixiyay*". Bay tiri: "*Dinaayey macnaha sidaa weeye. Dinaayey*", bay tiri, markaasaa muddo goortii la joogay baa marka dambe loo tagay oo loo yiri bal aannu u sheegno,

aan u sheegno gabadhii guurkii ay filaneysay in laga noqday aan u sheegno oo niraahno. Bal taasna aan ku dayno. Markaasaa loo tagay oo la yiri:

"*War Faruuro*", aasay tiri "*Hiih*", baa la yiri: "*Ninkii geela la noqoyoo oo warkaagii wuu ka baxay*", aasay tiri: dinaayey labada jeerba. Markii hore waxay tiri "*Dinaayey*", markii labaadna waxay tiri "*Dinaayey*". Marka maxaad i tiri baa la yiri. Markaasay tiri: "*Inaan faluurta laygu nacaynin waan filaayay*" bay tiri. Markii dambana waxay tiri: "*In la i soo doonayo oo geel la iga bixinayo oo ninka geela iga bixinayo idhahaayo naag ku gaarto malaha, waan filaayay*". Marka hadda anigu waxaan filaayay salaadoow inaad ka hadlayso, horta anigu waan filaayay saas, waan malaynaayay. Waxaan ku noqonayaa ninka la yiraahdo Salaad, baan ku noqonayaa. Meel la wada ogyahay bay kuu joogtay. Waxay kuu joogtay masaggada bahalaha cuna ayaad innooga sheekaysay. Masaggada xeerada markay gasho waad nooga sheekeeysay, marka la abuuro waad nooga sheekeeysay, sida loo kariyo iyo sida loo cuno waad nooga sheekeeysay. Waxaad nooga sheekeeysay oo kale marka la beerayo habka loo beerayo, waad nooga sheekeeysay. Waxaa keliya oo innogu kaa haray masaggada inta caynood ee laga dhigo inaad ku noqoto, inta caynood ee laga dhigo waxaa ka mid ah canjeeradaa ka mid ah, soor waa laga dhigaa, muufo waa laga dhigaa, cayn cayn baa laga dhigaa, marba si ba loo kariyaa. Masaggada iyo gallayda sida loo kariyo adigaa innoga waayo aragsan.

Salaad

Mahadsanid Axmed Nuurow. Horta gallayda iyo masaggada markii canjeerada iyo laga dhigayo waa kala duwan yihiin, aad bay u kala duwan yihiin. Masaggada cuntadeeda waxaa badan gallayda inta laga dhigo. Iyadana waa laga dhigaa, labadaba waa laga dhigaa. Waxay ku kala duwan yihiin baagaha dadka oo sameeya haweenka, yacni annaga intaan makiinadaha helin haweenka waa sameyn jireen. Marka haweenku gallaydu waa ku dhib badan tahay, aad bay ugu dhib badan tahay marka ay tumayaan, masaggaduse tumiddeedu waa fududdahay. Haddana marka canjeerada laga dhigaayo gallayda, waxay yiraahdaan labadooda canjeerada waxaa ku fiican oo ku badan, in kastoo aan anigu gacanta geliyay, waxaa ku badan bay yiraahdaan gallayda. Gallayda canjeerada canjeeradaa ku fiican bay yiraahdaan. Labadaba waa laga dhigaa. Marka masaggada canjeeradaas waa loo cunaa. Mid waa taan idiin sheegay oo dadka jaban iyada ayaa la siiyaa oo lugaha ka jaba. Qobka keliya ayaa laga qaadaa oo subag keliya ayaa lagu daraa oo wax kale lama siiyo qofkii haddii uu jabo. Marna waa midda Soomaaliya oo dhan cuntada la cuno ugu fiican oo waxaa la yeelaa waa la tumayaa, laba cayn bay u kala baxaysaa: mid jariir baan niraahnaa oo keligeed iyadoo aan waxba lagu darin yaa la kariyaa, midna iyada jariirta bay u dhowdahay, magaceedii baa iga maqane middaasna budada markay bislaato yaa iyadana lagu daraa. Marka waxaa la kala yiraahdaa jariir iyo xaniin, baa la kala yiraahdaa. Xaniinta waxaa lagu daraa budada, jariirtana laguma daro iyada oo keligeed ah, dabadeedna waxaa la yeelaa labadaba caano yaa lagu daraa. Marka waxaa la qaadanaa, labada, geed qori ah oo la qoray. Geed qori ah. Geedkaa qoriga ahaa lagu wareejinayaa, geed loo sameeyay ah. Markii ay bislaato wax yar baa la daboolayaa, dhuxul yar

baa korka laga saarayaa, in yar baa loo kaadinayaa. In yar markay joogto xeeradaa lagu soo bixinayaa. Xeeradii marka haddii lagu soo bixiyo, ama hilib, ama yaanyo ama wixii la heli karo markaas ayaa lagu cunayaa. Haddii kale caano baa inta la darsiiyo oo saas loogu daro yaa qofka wax ula mid ah ayaan jirin. Waa cunto cuntada ugu fiican. Markaan soo gaabiyo oo masaggada intaa uga haro, gallaydii iyadana waa ku dhawdahay, laakiin waa kala duwan yihiin. Waxay ku kala duwan yihiin gallayda xaggii soorta waa iskala mid. Gallaydii waxaa la yeelayaa marka ay soo baxdo oo ay sabuulka noqoto ayada noocyo badan baa loo cunayaa. Marka ay soo baxdo sabuulka waxaa la yiraahdaa oo abuurkii ka soo goynaya haddana habuuq baa la yiraahdaa. Habuuqaas waa la dubayaa, waxaa la saarayaa dhuxulo. Asaga oo qobkiisii qaba oo aan waxba laga qaadin ayaa la saarayaa dhuxulo. Waa la cunayaa, calooshana waa wadaa, waa shubayga shubayga ugu fiican. Waa caana badsaday baa la yiraahdaa. Marna waxay yiraahdaan kolsaasuu noqday oo lama jecla, waa marka uu bislaadka ku dhow yahay, marka ay ka baxdo. Dabadeed gallaydii, sidii masaggadii oo kale, loo tumayaa, soomaalidana middaa gallayda ah waxaa weliba ka sii daran dadka gallayda oo yacni yaqaan oo beeraleyda ah. Ilmuhu waxay ka soo ordaan halkaas oo kale markay habuuqa maqlaan (urshaan). Ilmaha waa lagu soo ordaa, hab baa la siiyaa, kor baa loo qaadaayoo habuuq baa la siiyaa. Markaasay guriga kula cararaan oo markaas mar laga jecelyahay ma jiro oo ilmaha haddii aan habeenkaas habuuq la siinin ama aad adiga maanta beerta soo aadin, kaa joogi mayaan. Waxa ay ugu jecelyihiin weeye. Dadka oo dhanna si kasta oo uu u gaajeysanyahay marka ay sidaa u baxdo waa laga dhergayaa, xitaa duunyada dadka iska daa. Dadkuna waa ka dhergayaa, marka sidaas wax ula mid ah markaas ma jiro. Markii dabeeto ay soo go’do oo habuuqii ka baxdo, waa la tumayaa. Horta meel baa lagu aruurinayaa, waa la tumayaa. Laba cayn baa markaa laga dhigayaa. Midda horta diirkii baa laga qaadayaa, mid god la yiraahdo bakaar yaa lagu shubayaa. Godka bakaarta ah middaa lagu shubay illaa iyo soddon sano, haddaan biyo u galin, waa ku jiraysaa. Marka waxaa laga ilaalinayaa oo iyada cadawgeeda ah, qoyaan baa laga ilaalinayaa oo wax qoyan waa laga ilaalinayaa oo in badan bay oollaanaysaa. Markay nag noqoto oo qallasho yaa godka lagu gurayaa. Taas marka godka lagu shubayo waxaa la yeelayaa balkeeda ayaa la soo qaadayaa, afkaa laga daboolayaa godka. Marka ugu horreysa, inta aan weli godka lagu shubin, godka waa la culayaa, sida weelasha loo culo oo kale ayaa godkana loo culayaa. Godka gudihiisa dab baa lagu shidayaa, waa la culayaa. Haddii godkaa la culo ka bacdi waxaa la yeelayaa gallayda baa lagu shubayaa. Markaa balkeeda baa la soo qaadayaa, afkaa laga saarayaa, markaa qoryo kale oo dhaadheer baa saas lagu leeyahay. Marka qoryaha saas lagu yeelo, balkeedii baa afka laga saarayaa, markaas baa ciid adag oo ciidda dhooboyda ah korka laga marinayaa. Middaasu waa mid, middaan kale xiiseey baa la yiraahdaa oo waa la ulaynayaa, gacanta waa lagu bilbilayaa, taas waxaa lagu gurayaa jawaanno. Jawaannadaas waa la iib geynayaa ama waloow kan ila socdo ha qaado ama yacni beledkaba ha la geeyo ama guriga ha iska tiirsanaato waxna ha laga cuno waxna wixii suus suus iyo waxyaalahaas u beeganayaa baa laga iibiyaa. Marka ay

cuniddeedii noqoto, mid waxaa la yiraahdaa soor, mid canjeero baa la yiraahdaa, mid waxaa la yiraahdaa daango oo waa la dubayaa, muxuu ahaa, saliid. Adigu wax dufan leh, midna ciid bacaad ah yaa digsi lagu subaya. Kulligeed waa caddaanaysaa, hal halkoo iska haraya oo madoobaanaya baa ku jira, ayay noqoneysaa, tan kalana waa kala barmaysaa. Midda dufanka leh waa kala barmaysaa. Bur sidiisii buu noqonayaa. Xoogaa yar wuu madoobaanayaa, barna waa caddaanayaa. Markaas maxaa loo jeedaa mid la yiraahdo cambuulo oo la cuno oo aan kala harin, ama isha laga bixiyo ama isheedaba ay qabto, yaa guriga la dhigayaa oo waa subixii af-billaw baa la yiraahdaa. Haddii ikhyaarta ay timaado oo bunka la dubo ayaa iyadana loogu daraa oo iyadana waxaa la yiraahdaa toor, baa la yiraahdaa oo lagu toorto. Middaas haddaan meeshaas ku dhaafo, marka middii haddaan u soo noqdo oo soorta ahayd, soorta waa laba cayn. Iyaduna mid waxaa la yiraahdaa bad-bad, bay yiraahdaanoo qofka caloosha laga hayo iyo ma aragtay qofka aan cuntada cunaynin baa la siiyaa. Iyadana xoogaa yar baa laga dhigayaa oo waa la jilcinayaa oo waa la jilcinayaa oo waxaa lagu darayaa caano ama maraq, baa lagu darayaa. Qofkaasu caloosha waa u soconaysaa. Qofkaas iyadoo jilicsan buu bakeeri bakeri u cabbayaa oo haddana subag lagu darayaa. Midna waa la adkeynayaa oo waa sidii masaggadii oo kale oo waxa lagu cunayaa ama hilib ama caanna lagu cunayaa, waa la darbinayaa haddii Allah kuu roonyahay. Dheregteeda waa laysugu faanayaa. Nin walba wuxuu leeyahay "*Bal sidaan wax u qaadayo bal eega*". Marka ninka calooshiisa waa buuxin karaa oo ninka calooshiisaas naaxin kara bahashaasaa laga arkaa. Mid kale fur-fur baa la yiraahdaa. Waxaa la yeelayaa iyada markii la tumo oo la garaaco buunshada waa laga reebayaa, middii budada ahayd waa laga reebayaa, marka xaniin bay yiraahdaan oo intaas bay la egtahay. Marka sida bariid ahaan, ninkaan aqoonin, bariid buu moodayaa, gacanta oo dhan waa ka kala daadaneysaa soortaas fur-furka ahi. Iyadana ama caanihii ama hilibkii yaa lagu cunayaa, laakiin iyadu waxay ku fiican tahay hilibka. Axmed Nuurow anigu hadalku waa igu dheeraaday, intaasaan uga baxayaa, mahadsanid.

Axmed Nuur: Horta aad iyo aad baad u mahadsantahay. Haddana waxaan u gudbinayaa nin halkan oo isna dhaar dhaaranaya oo isagana wixii Nugaal dib ugu noqonaya oo dhul mar ah, ninkaasuna waa Dhega Weyne oo aan gadaal u reebtay. Dhega Weynoow adiga iyo masaggo iyo gallay qofkii adag baan annaguna eegeynaa.

Cabdi Dhega Weyne: Horta beeraha waddanka aan anigu ku dhashay, beeraha waa looga badan yahay. Waan ka tegay waddanka oo markii ugu horreysay waxaan qabtay galbeed. Illaa galbeedkaas waa ku fogaaday in badan, muddo dhawr iyo toban sano ah baan joognay, xitaa carruurna waan ku dhalay. Horta beertu waa badantahoo, tan bunka lacag baa loo beertaayoo wax lacag loo beerto, galbeed, wax cunno loo beerto weeye. Ha la karsado lacagta ha loo beerto oo waa badan tahay. Galbeed beer buu ku leeyahay, hayeeshee kan la cunayo waxay u kala yaqaannaan geed-daaq iyo geed-beer. Qamadiga midaynaan gaartay, bariidka oo ay beertaan waa isku geed oo in yar bay ku kala duwan

yihiin oo waa caws oo geed daq baa la yiraahdaa. Intay wax kale u sii dhexeysiiyaan bay ku sii shubaan oo cawska marka geedka kaliishiisa soo baxdo waa taa marna curdanka ah marna gahaynka ah marna engega. Marka cawsku engego yay iyana engegeysaayoo cawskaasay la goosanaayoo dhir yar yar oo iyana geed gaabka ka mid ah, mushus la yiraahdo oo geedka bariidka lagu daro u eg, gudguduudan, miro yar yaroo saas ah yuu u eg yahay geed saarkaasu waa ku jiraa. Tan kale masaggada iyo gallayda, iyagu masaggaday u badan yihiin. Masaggadu iyagu laba siyood bay u beertaan. Meeshii carro cad ah waa mudi, meeshii carra madow ahna dibi. Marka la carro rogo oo ay jiilaalka tahay oo dibadda la mariyo yaana jiilaalkaa jiilaal duug baa la yiraahdaa oo jiilaalkaas baa lagu gooynayaa ama markii rayska noqoto yaa markii horay loo carra rogay oo dibidii la mariyay yaa dibidii lagu boodayaa. Ninka haddii ay ku qabsato khamdi bay yiraahdaan labadaa dibi iyo qorigooda iyo waxa isku xiran. Ninku hadday isaga iyo khamdigiisa ku qabsato ninka iyo labadaas dibi iyo alaabtiisa khamdi bay isku yiraahdaa. Khamdiga markay ku qabsato gacantaa bidixda ah irsigii buu ku haystaa labadii dibina waa waa daba dhigoo xaraash buu yiri oo waa canaananayaa, gacantana haruurkii, labadii dibina wuxuu ka wadaa dabada oo cayn buu leeyahayoo ama haddii uu dayle yahay wuxuu leeyahay dayle. Magacyay kala leeyihiin, haddii uu niil yahayna niil buu leeyahay. Magacyadaas waa isku yaqaannaan, wuu canaananayaa, dibidiina wuu la daba joogaa oo saas buu leeyahay. Meeshii ugu sarreysay markuu joogo, yuu soo laabanayaa. Halkii buu haddana kaga soo billabayaa, maanta, berri, saa dambe illaa ay kaga dhammanayso. Haddii ciidan waayo, ay qabsato, saas buu ku beeranayaa oo beertiisii ku dhammaysanayaa. Gacanna irsiga buu ku haystaa, dibidiina waa wadaa oo gacanta buu la daba joogaa. Saas buu ku wadaa. Ninka ciidanka haystana waa ninka guurkaa bixiya, labaatan labaatan khamdi, toban khamdi, shan iyo toban khamdi, waxaas buu bixiyaa maalintaa cunnadooda isagaa qaba. Wax kale cid weydiin maysid. Subag, masaggo, gallay. (Dheryo) waaweyn bay wax ku qabsadaan reer galbeedka. Digsiyadatan iyo sufriyadatan wax kuma qabsadaan, dheryahaa waxaa laga bixinayaa caano lo’aad oo aan sonkorba lagu darin, caano lo’aad baa laga soo buuxbuuxinayaa oo xawjaa la yiraahdaa. Xawjahaasuu soo qaadanayaa, geed aan waddankan ku oollin oo waddankan galbeedka ka baxa oo Soomaaliya marka laysku kiciyo oo xibnaha waaweyn leh ugu sharafka badan laga bixiyo galbeedkuu leeyahayoo oo xeryahaas maalintaasaa la soo gurayaa. Dad ku gabyay oo oran jiray garbi kama baxdaa arlada iyo waddanka xeerada garbeedana, xeerada waddanka oo qiimo siyaado ah ayay dheertahay xeerooyinka garbida ahaa ee waaweynaa, afartanka qof ama kontonka qof ama lixdanka qof middii deeqi jirtay, illaa iyo boqolka deeqayba maalintaas ayaa la soo qaadayaa. Xeeradaan garbadka ahayn iyagu mayaqaannaan ee laakiinse maalintaas ayaa la soo gurayaa guudkaas xeeryahaas ayaa loo soo gurayaa. Marka horta ay jiilaalka ku beertaan, horta sidaa weeye. Masaggada iyo gallayda meel mawada galaan. Labadaba waa waxtar laakiin, waxba mawada galaan. Wax masaggo ah oo Soomaaliya innoogu soo baxay ma jiro, quusku waa gallaydu, waa ku badanaysaa inta yar daris baan nahay oo waan is wada naqaan beerna waa wada

leennahay, midba maalin baa loo tagayaa oo waxaa la oranayaa “*Berri hebel baa duulkii ah ee ha loo tago*”. Beerihii kale waa la daynayaa, waa la daaxinayaa, waa la oodayaa. Nin walbaa dibigiisii, khamdi baa la yiraadaa, khamdigiisii buu aroortii la soo kallahayaa. Beertaadii buu imanayaa, illeyn adigaa ballamisiiyee, beertaaduu la soo abbaarayaa. Sidaa weeye oo waa iskaashato. Dibigaa baa beerihii lagu dhameynayaa. Marka la goynayo ee la goynayana waa caynkaa, waa quuskaa, marka la beerayana waa quuskaa, illaa mid sidaan sheegayay u beertaa oo shaqaaale xumo ku qabsato waa ku daa. Masaggadana ma aha, gallayda iyo masaggadana waa kala jecelyihiin. Haddii la yiraahdo canjeero iyo haddii cunno la yiraahdo, iyo si kasta ,labadaba waa wax cunno ku wanaagsan oo waddankayna ugu fiican, laakiin wax masaggo caddey la mid ah ma aynu hayno, ama ha gaduudnaato ama ha caddaato. Marka masaggada baa galbeedka laba cayn ka ah. Waa kala cad badan yihiin waana kala dhaqso badan yihiin. Masaggo dhulka carro cadka ah ayay ka baxdaayoo waa la miideeyaayoo waa tan miidaha ku baxdo oo waxaa la yiraahdaa masaggo caddey, waana ka waaweyntahay tan kale. Tan kalana Cilmi Jaamac baa la yiraahdaayoo waa ka yar-yartahoo waa ka gaduudan tahay waana ka waxtar badan tahay taa, oo illaa Cilmi Jaamac ayaa la waayay oo taa gaduudan la waayay, taa cad-cad ee quruxda badan eena waaweyn oo carra cadda ka baxday, la cuni maayo. Marka la iibsanayana, lacag badan bay goyneysaa, waa ka macdahay oo waa ka lacag badan tahay, oo lacag badan bay goynaysaa. Marka la cunayana, lacag badan baa la leeyahay oo waa la jecel yahay horta. Waa masaggo la mid aah, gallayda oo soo raacda mooyee, wax kale oo soo raaca ma jiro. Waxaa soo raaca geed la yiraahdo qamadiga oo isna burka laga sameeyo. Waxaa waddankeena jooga qamadigaa oo aan sarreenka u naqanno, qamadi buu galbeedka yiraahdaaye, sarreenna waa yiraahdaaye iyo masaggadaasaa ugu fitamiin badan oo haddii gacanta ku jabto ama haddii lugta ku jabto wixii xaggaa idinka xiga iyada iyo subag bay ku kabayaan. Intay galka ka xooraan yay iyada iyo subag bay ku kabayaan. Gallaydii lagu kabi maayo, hilibkii xoolo iyo caanaha midna lagu kabi maayo, iyada baa lagu kabayaa. Waxayna ku leeyihiin kabi maayo dhuuxiisii ninkaa, ninka bahasha badsado haddii la gaajoodo ama la duulayo intay kariyaan bay leeyihiin iyadana tigaabadaan Soomaaliya ugu fiican weeye masaggada. Reer galbeedka markay guurayaan ama meel qabanayaan oohday ku ridayaan ama tibraarkaas oo kale ayey ka buuxsanayaan, qullo biya ahna waa hee qaadanayaan. Markay gaajoodaan oo meel marayaan waa hambanayaan oo afka ayay ka buuxsanayaan, qulladda biyahana waa ku kabbanayaan. Meel Allah keeno iyo meeshay doonayeen saas bay ku tagayaan oo ku ictamanayaa, Marka gallaydii waxay ku fiican tahay laba jawaan ama jawaan soo qaado oo guriga u dhig carruurta, waa kaaga joogayaan carruurta iyo naagaha, yacni waa la mushkileeyaa si ay kaaga joogsadaan hadday jiilaalkii tahay oo dee marka wax bay ka dhiganayaan cidda. Masaggada mar cambuulo ayay ka dhiganayaan, mar daango ayay ka dhiganayaan, marba wax ayay ka dhiganayaan. Saas bay ugu fiican tahay cidda oo afka ayay ku beddelanayaan. Waa sahay wanaagsan oo ka canjeereyso, oo ka muufeyso oo gaajadana way kaa bi’ineysaa, laakiin waxtar iyo calool u

roonaan haddii la dhaho gallayda (?) ayaa ka badisa oo iskuma dhawa, qamadigana waa ka badiyaa, waa kan burka iyo laga sameeyo oo haddii sidiisa loo kariyo dabkaa lagu raajinayaa, waa ku raageysaa oo waa kan sarreenka ah, subag iyo caano ayaa lagu darayaa, waa fitamiin aan kaas oo kale la arag. Markii oo burka laga dhigo waan aragnayba. Mid kale oo iyadana waxaan aan lahayn oo caloosha iyo loo cuno, garabi la yiraahdo, buu galbeedkana leeyahay, marna ay hoodig yiraahdaan, marna ay garbi yiraahdaan oo caafimaadka loo cuno. Iyadana waxas oo dhan way ka caafimaad badantahay. Waa kan aan fitamiinku ku gaarin oo iyadana geed gaabka ah. Saddexdaasu bariidkay u egyihiin oo biyaha ayuu kaga duwan yahay. Bariidku waa in biyo kar kar lagu kariyaa oo midka biyaha oomanaha ah ka adkeysanaya ma aragtay, yay ku kala duwan yihiin, laakiin markay dhulka yaallaan waa isku mid oo waa isu eg yihiin, marka cawska engegana waa la engegayaan oo markaas baa la goynayaa. Marka galbeedka iyo Koonfurta anigu waxa aan u badsaday galbeedka, marka la gooyo oo intii aad soo marteen la soo maro oo dheellidii la soo dhaafo oo hararihii la soo dhaafo, haran bay yiraahdaane, ee quuskaa la soo dhaafo ee la gooyo, karood baa la yiraahdaa oo waa la karoodaaye. Karoorkaas ay yiraahdaan marka la dhigo ushaas oo keliya lalama dhaco. Lo’day u tagayaan oo waxay soo goosanayaan labaatan sac, ninba intii uu karoorkiissa le’egyahay, bay dibidii xoogaa lahaayeen ama lo’dii xoogaa lahaayeen soo goosanayaan, horna way isku soo raacayaan, way isla soo soconayaan oo hareeraha intay hore u dhigaan bay isla taagayaan. Saas bay isku daba mareysaayoo sidaasay isla daba wareegaysaa. Masaggadii dadka saas baa u dhib yar oo saas baa u fiican. Wax allaale iyo wixii masaggo ahaa dhulkay yaallaan, gallaydiina dhulka bay taallaa, iyadana lo’daasay ku tumaan, hadday doonaan iyada oo ay ku badan yihiin lo’dii xoogga lahayd bay soo soocayaan. Dhuuso iyo xaarba waxay sii daayaan, iyagu waxba uma waxay doonayaan inay gallaydaas ku tumaan. Ninka reer galbeedka ahna iyo caaqibkaan iyo nimankaan reer galbeedka ahna, iyo dadkaan xaggaa haddayba doonaan, wixii xaggaa innaga xigana, waa waydiinaysaan in lo’da lagu tumo iyo in kale oo dee hadalkan haddii wax iiga noqdaan waa weydiinaysaan, lo’daa xoogga leh baa la soo soocayaa, haa, karoorki baa hareeraha layskaga taagayaayoo saas bay isula daba waregeysaa oo meel ay u baxdo malaha ee oo siday u hadiiqayaan oo u hadiiqayaan oo waa yaqaanniin oo markay tiraahdo ay is yiraahdaan hadiiqan waxba kama sheegi kari, tan galbeedkase saas baan anigu u hayaa. Bunka iyo qaadka iyo masaggada iyo gallayda, intaa iyagu kalama dheera. Kan bunka iyo kan qaadka iyagu ma sinna. Qaadka isaga roobka ayaa lagu beeraa. Marka waxay isugu faanaan iyagu ninka bunka ninba intii uu geedka bunka ah dheeryahay, ninka kale yay isugu faanaan boqol geed oo bun ninka leh, waa taajir. Ninka laba boqol leh ka daran, kan saddex boqol leh, ka daran, kan afarta boqol leh ka daran, kan kunka lehi ka daran. Horta kaa waa midka ciidammada qabsanayee jiifka ku cunaayee oo isagu aad u taajiray. Marka taasu waa mid. Waxaa jira mid kale oo waddanka laga beeray, dhulka qaadkii la beeray, adoo socoto ah aad arkayso isaga oo dhulka daadsan. Meeshan baad weli iyo goray lagu leeyahay dhulkaa qoyaan biire iyo golahaa baad weli hareerahiisa iyo

geedkan laynka la yiraahdo, haa dhulka ayuu daadsan yahay. Waadba iska guranaysaa. Marka horta haddii beer la yiraahdo, anigu taa galbeedka ah ayaan arkay inta aan haatan liqsanahay mooyee inta aan ka gaarayna intaa weeye. Canjeero iyo sonkor bay yiraahdaan iyaguye koronkor iyo jariir aan laba qudayda ahaa iyo haddii maayo laxoox oo hee canjeerada ka mid ah iyo habaq bahal la yiraahdo oo haddee la jilcinayo oo la cabbayo, mashaambil oo iyana doog darbud ah oo heeddaa u badan geedka masaamida iyo heeda aan kuu sheegaayana caloosha ayay u cunaan. Masaamiddooda geedkaasaa ugu fiican. Waxaas oo dhan bay ka samaysanayaan. Waxaa jira af oo lagu darsado cunnada oo cunnada oo dhan lagu darsado oo geedkaas cafar la yiraahdo oo kuus kuusan oo u eg bahalkii berigii hore kaamilka iyo berigay ahaayeen, ma garanaysaa, oo cad caddaa yuu u egyahay. Cafar baa la yiraahdaayoo waa biidcaa oo iyagu cafar bay yiraahdaan. Waa la helaa oo waddankaynana waa la keenaa oo waa la helaa oo inta goonni loo kariyo ayaa koosaar weeye oo goonni ayaa loo kariyaa. Geed kale oo la mid ah oo ka buuran baa isna jira oo geed gaabka ka mid ah oo ninka caloosha xiranta cuna oo geedka uu ku yaal marka uu bislaado iyo marka la kariyo iyo yay iibsanayaan oo suuqyada ayaa lala fadhiyaayoo inatay soo kariyaan oo faraqaa laguugu shubayaa, markaas ayaad cunaysaa oo caloosha hadday ku xiran tahay, markaas ayay caloosha beddeleysaa, caloosha waa ay kuu fayoobanaysaa, xubxuubaa la yiraahdaa. Marka waxyaabahaas ayaynu soo marnay, iga qabo bal.

Axmed Nuur

Ninka la yiraahdo Dhega Weyne, adigu hadda reer galbeed baad tahayoo bal waxaad mooddaa xoogaa yar inaad naga baxday oo Aw Daahir Af Qarshe baa kuu dhaw oo asaga ayaad isku dhawdihiin. Calaa kulli xaal waxaan ku noqonayaa magacyada loo yaqaan badarka intaanan Daahir Af Qarshe iyo u gudbin Fiqi Buraale, waxaan rabaa in la kala saaro badarka midabyada uu leeyahay. Abuur cas baa ka mid ah, waa magac loo yaqaanno, waxaa loo yaqaannaa masaggo caddayna waa la yiraahdaa. Waxaa kaloo maqlayaa masaggoo guduud, waan maqalnaa, waxaan maqlaa gaduudane mid la yiraahdo ruuxiisa waan maqalnaa, fiirfiire mid la yiraahdo waan maqlaa. Adigu magacyada noocaas oo aan ka maqlo, weli khaasan gaduudane, shamuurey, cadood, masaggo caddey, falfalliir, haycad, abuur cad, waxnoocaas ah, magacyadaan ku noqnoqdee, wixii waa naastaree, waxa kaleeto oo aan rabaa in la sii kala guro oo aad loo sii kala saaro xeerada markaan leeyahay, erayga xeerada ahi waxaa weeye waa sida loo cuno, ama waxaa laga sameeyo, qaabka magacyada loo yaqaan. Markaan erayada jeeljeelaynaa waxaa weeye luqada ayaa sheekada ka qiimo badan. Kow, waa soor, waan maqlay, kashiisho waan maqlay, shurbad waan maqlay, canjeelo waan maqlay, garabutaale waan maqlay, muufo waynu maqalnay, bariid waynu maqalnay, laxoox waynu maqalnay, mushaari waynu maqalnay, salool waynu maqalnay, cambuulo waynu maqalnay, garaw waynu maqalnay. Erayada noocaas oo kale ah marka waxaan ku horraysiinayaa waxyaalaha noocaas, erayada noocaas ah afkiinnaa ku badanaa kuna kala daah baahbahsanaa ee la socday oo midabyada le oo xikmad cunnada laga sameeyo leh oo habka loo sameeyo leh iyo sida ay yihiin

leh. Waxaan ku celinayaa Aw Daahir Af Qarshe.

Daahir Af-Qarshe

Mahadsanid. Haruurka oo qura markaynu soo qaadanno sida loo isticmaalo, aynaan meel kale u leexanin, sida loo abuuray oo looga shaqeeyay, soo wada marnay, sida dabadeed isaga loo cuno oo keli ah haddaynu u soo laabanno, waxay doonaysaa macallimiin in looga doono magaalada la yiraahdo Jabuuti. Baan ku talin lahaa. Macallimiintaas oo ah kuwii ka tagay Awdal, macallimiinta Awdal oo Jabuuti u guuray yaa la doonayaa in la helo. Bal horta aynu is-dhagaysanno. Macallimiintaasi. Haruurka waxaynu ku sheegnay, waxna waa in la kariyo oo karis baa lagu cunaa, waxna siyaabo kale baa loo cuna. Marka la leeyahay Jabuuti ha laga doono macallimiin haweena, waa cilmigaan ku arkay Awdal marki ay dhisnayd, lagu macaamilan jiray, waxaan aqaannaa kow iyo toban goor, kow iyo toban nooc oo aan ahayn kariskii aynu soo sheegnay oo aan ahayn muufadii aynu soo sheegnay oo aynu muufo u naqaanno ama kidaarba u naqaan iyo kuwii soorta ahaa iyo kuwii la karinayay iyo intii la karinayay, kow iyo toban nooc oo kale loxooxdaynu ka naqaan yay haweenkaasu yaqaanniin. Waa wax caqliga ka badan waxoo dhamiba shiilliin bay u badan yihiin nooc nooc lagu darana way jiraan biyaha badahaa la sameeyaa, suxuuntii baa iska daba imaanaysaa wada haruur miiran ahoo dabadeedna soo kala horraynaysa. Cilmi aan la gaarin oo aan dhulka kale laga aqoonin weeyaan. Dadka galbeedka ah ee dabadeed aad u beertana ma yaqaanniin, waayo magaalada tan waa magaalo guun ah, haruurkana uu weligii ciridka ku hayo oo iyadu uu ka dhoofo, magaalada Awdal. Marka dabadeed casumadaha la sameynayo yaynu waxaas ku aragnay oo markaas baan waxaan kale ee aan naqaanba waa iskaga tagaysaa. Diyaasaddaa hilibka ah iyo bariiska kan iyo haruurka intii nooc ee aynu u naqiinnay ee aynu soo wada marnay oo dhan waa laga wada tegayaa. Kow iyo tobankaa nooc ee aynu laxooxda ka naqaanno yaa loo baahanyahay. Waa cilmi oo innaga qarsoon. Waa yahay. Haddaynu haddana isagii soo raacno, haruurkii, galbeed waxaa lagu sameeyaa haruur garaw ah, baa la kariyaa. Marka haruurku oo aanu dillaacin oo uu yahay garaw saato, oo uu yahay halkii ninka, intaanu hee dillaacin, ninka jaba lagu kabi jiray, ayaa xoogaa la warayaa, in biyihii markay karkaraan lagu kariyay yaa loo jeedaa markaa saa dabadeed iyadoo la gartay in biyihii ay ka dhaceen sidiisii kalana waa qoyan yahay, yaa weel lagu shubayaa. Weelkiibaa dabadeed sidii luqmaddii subag la'eg baa lagu shubayaa, sidii xeerihii oo la absaari jiray oo kale ayaa meel layska dhigayaa. Bishii ramadaan baa lagu soomay oo hee dadkii ka dhigtay saxuur oo qamtaa ka saarayoo dabadeedna dawo xanuun oo aan weligeenba naqiin wanaaggiisa aan is-beddelayn subagna ku jiro, xumaanna looga baqaneyn. Waa sidii oo dhan leeynka baabi'iye, bisha soddonkeedii oo lagu saxuurtayoo oo ninka calooshiisii aan istaagaynin oo jirkiisii si kale u xumaanaynin ayaa la ogaaday. Haruurka horta qiimahaa ayuu gaaray. Qiima kale ayuu gaaray. Ninka ay subagga ka baaysaminin intuu sidaan u kariyay oo weli waray oo u yara kansatay, biyihii ka yar dhammaadeen, yaa ama ohli ama tibraar ama wax uun lagu shubay oo ninkii soccaalka ahaa iska qaatay. Wuxuu ka ilaalinayaa markaa in aan dabaylu u gelin. Ma qurmayo. Isagoo iska karsan buu xaabsanayaa

dabadeedna calooshii uun baa halkaa joogsanaysa. Isla intii la doono buu raashiin u ahaanayaa. Dab dambe ma dhalilinayo, karuur buu ka dhergay biyuuna cabbayaa. Taasina waa cilmi kale oo haruurka loo helay oo waa cilmiyaal innaga maqan. Cilmi kale waa loo sameeyay. Hooyooyinka wanaagsan ee galbeed, dheri bay ku kariyeen. Markii uu ahaa xilligii uu biyaha liqayey e bisayl loo gartay, biyihiina ay ka dhammaadeen yay subag ku shubeen kobodhaydu intuu ku jira xurbinkii baa loo qaaday, cabbaar dhan buu dabkii ku karayaa, waa la wada gaarsiiyay, markaas buu dabadeedna subaggaas baa ka goynaya jir jirku uu ka haystay dheriga iyo haruurka ay isku haysteen yaa subagga lagu daray ka gooynayaa. Meel ay u sameeyeen oo geed cadar iyo wax kale ah way ku wada dareen, kaasuna udgoon buu kordhinayaa. Cabbaar baa sidaa loo walaaqayaa, welina dabkii buu saaran yahay xilligaa. Markii la ogaaday isagoo dabkii saaran yaa inta laga qaaday oo lagu riday meeshiisii. Markii meeshiisii lagu riday ayaa dabadeedna lagu shiqsiiyay daboolkii la saari jiray oo weliba cunahaa iyo waxaa aad arkayso waxoogaa maryo ayaa lagaga xiray. Dhulka waa laga qaaday oo meel ayaa laga soo laalaadiyay. Ninkii guriga lahaa ee maqnaa yaa la doonayaa in looga dhigo kayd. Mar allaale iyo marka uu yimaado, sidii reer miyiga dhiisha caanaha ay soo qaadeysay hooyada wanaagsan, yay iyagoo sidiisii u kulul, sidii wax firintijeer la geliyay oo kale oo kulaylkiisii wata oo iidaaman oo udgoon oo iska diyaar ah, yay inta ay dhulka soo dhigto, wuxuu ka cuni karayay uga goynaysaa. Markaas waxyaalahaa waxay ku tusaysaa in haweenkaynu uu yahay wax kinsi ah oo aan wax iska fudud ahayn oo intaas oo goor uu dhaxal gelayo. Xaggii cunnada haddaan intaa ka yara taabto, bal aan ku noqdo aaladdii lagu qodayay. Taa ma aynu taabannine. Haruurka sida loo beero iyo sida uu u soo baxo iyo sida loo cuno ayaynu haynaaye, bal horta aaladdii aan ku noqonno. Aaladda inta aan la helin, miidaa lagu qodi jiray iyo inta dhirta yaambo loogu xaaso baa lagu qodi jiray oo laysku simo ayaa geed dheer sidaa loogu muday oo dhiigii ahaa oo dabadeed abuurkii lagu sameynayey ka dambana dibi baa la helayoo waa kan jeexayee dabadeedna haruurkii la beerayo, dabadeedna dibigu intii iyo bahasha dhirta ahayd carrada saan buu ugu rogayaa ka dibna haruurkii camuudda labada meelood lagu kala qubi. Lagu aasi maayo, waa la dhigayaa aaladaha dabadeed casriga ah laga helay cagaf-cagaftan iyo waxaan dabadeedna isagaa is-daboolaya. Intii waxaasu aan jirin, dibigii aan ku noqonno. Dibiga waxaa la sameeyaa: labada dibi qori lugta looga kala rido oo mid walbaa haddana laba kala hayaan oo hoosta lagaga xiro. Waxa kaa la yiraahdaa kuwa hoosta ka qabta, mawaahilaa la yiraahdaa, taa halkaa ka haysana harqood baa la yiraahdaa oo waa taa labadaa dibi isku haysa. Usha weyn ee xaggaa dambe soo jiitamaysana midmi baa la yiraahdaa ee uu ninku ku hayso birta. Birtaa uu dhulka ku jeexayo oo daabka weyni ku jiro oo dhulka inta hoose kula jirta, intaa hoose irsi baa la yiraahdaa oo uu dhulka ku jeexayo. Haambaydana waa middi bahashan qoryo yaryar oo hareeraha kaga jira baa jira, oo iyaguna lagu xiro, jahuuriyaa iyagana la yiraahdaa. Xarig laysugu xiro oo suun ah ayaa jira, geel-jiraa la yiraahdaa. Waxaa dabadeed ninkaa aan sancada aqoonin dee isku wada xiri kari maayo oo waa cilmi rag yaqanno inta bahashaa uu dalooliyay, dabadeed dhexdhexadeeda yuu

birtaas ku taagay. Ninkaasi cilmi baa wadata. Suunka dheer ee uu dabadeed gacanta ku haysto dullaa la yiraahdaa iyo inta isku samaysan dibiga waa yaqaannaayoo jacayl iyo lacaygaas marna waa noqo marna waa soco. Dibiyadaasu, sidii Dhega Weyne u sheegay, Qoore, Diinle, Xayle, mid walba wax baa lagu sheegaa oo markaas isku garanayaa kii lala hadlayay oo markaas buu dibiga soo qaadayaa adinka, joojinayaa, amase hadday birtii qabsato meel dhagax leh ama geed xididkii oo markaas buu hakanayaa. Hebel, markaas buu dibiga soo qaadayaa addinkii, kolkaasay dabcaysaa illeyn bahashii waa diiddantahayoo dibiga halkan naga jooji oo bahashii meel bay haysataaye. Waa yaqaannaa hebel. Markaas buu dabadeed addinka soo jeedinayaa oo waa kala baranyahay. Dibigan tababaran waxaa la yiraahdaa waa xaraa, dibigan tababarnaynna waxaa la yiraahdaa kanaa waa hayin iyo buuq bay kala yihiin. Marka labada afba waa Qoti. Dhanaan iyo xaraar labadaas biyahooda laba ceel bay kala yihiin. Sida kale ee ay u shaqeeyaan waa si la soo wada saartay. Anigu bal intaasaan kaga baxayaa. Waa lay gacan hatinayaaye, idinkalee waaye.

Axmed Nuur — Horta Aw Daahir aad iyo aad baad u mahadsan tahay, hase yeeshee xoogaa yar baan kaa qabsanayaaye, waxaa weeye baabka lagaga shaqeeyo iyo qalabkaa oo dhan wuxuu noqonayaa mawjad u gaar ah oo goonnigiisa ayaynu uga hadlaynaa oo waxaynu maanta ka hadlaynaa tan kaliya oo qodobkeedu ahaan doono oo qoladaas inay kala gurtaan bay rabaan oo mawduuc mawduuc waxa la dhigo. Waxa weeye midabyada badarka, waa kow. Masaggada cadday baa ka mid ah, falfalliir baa ka mid ah, abuur cad baa ka mid ah, guduudanaa ka mid ah, cay cad baa ka mid ah. Wax noocyahaas ah ayaan anigu il bixin, oo ka hadal ma aha, oo anigu ka hadli maayo, laakiinse idinkaa iga badan oo haddaad magacyo ku dari kartaan waa inaad ku dartaan, waa kow. Xeerada ruuxeeda lagama maarmaan weeye oo iyadana waa laga hadlayaa oo dib baan u soo celinayaaye waxaa weeye soor, waxaa jirta soor baa jirta, oo waxaa jirta mushaari baa jirta, waxaa jirta kashiisho baa jirta, cambuulaa jirta, korobutaalo ayaa jirta, garaw baa jira, muufa jirta, kibis baa jira, canjeero ayaa jirta, laxoox baa jirta, shurbad baa jirta, casiisad baa jirta, bad-bad baa jira, intaa oo dhan, waxaas oo dhan badarka ayay ka imaanayaan, kulligood badarka iyo masaggada, labadaas ayay ka dhalanayaan. Marka iyo waxii kale ee lagu dari karaba ha lagu daro. Haddana waxaan ku wareejinayaa abwaanka wayn ee Cali Mudiir oo isaga weliba beeraley wayn ah. Haye Cali Mudiiroow.

Cali Mudiir — Saaxiiboow iga daa kuma fiicni runtii arrintan isaga ayaa sheegay, saaxiibkay Axmed Nuur, waxaana dhinacayga fadhiya Fiqi Buraale, marka waxay ila tahay in odayaashii inaan u dayn doono. Waxaan ku noqonayaa wax yar oo ay aad iigu hadleen odayaasha. Waatan iyada garawga ah. Faa’iidada garawga duqaydu waa ay ku noqnoqdeen, garawga ama cambuulada, waa midda qobkeeda lagu kariyo. Annagu cilmi ahaan waxaan ku aragnay in laga helo fitamiinka la yiraahdo “ii” (Vitamina E). Runta waan sheegay, laakiin bal horta dib aan ugu noqdo fitamiin “ii” da laga helo waxaa weeye dhirta ku jirta. Boqoraddayna hadda meeshaku badan xoogaa aaladda inay laciiftay baa la sheegay.

Midda kaliya oo xoojin kartaa qorayga ama bistoolaha ragga markay xoogaa gaboobaan, gabayaasha markay ku jilcaanaa anigaa sheegi doonee, waxaa ka mid ah bahasha garawga oo qobkawaa "Vitamin E", marka anigu maaddaama ay odayaashu u baahan yihiin "Vitamin E", garawga dib ha loogu noqdo. Waad sheegeysaan. Anigu waxaan ku celinayaa oo keliya in laga helo "Vitamin E", garawga ayaa lagahelaa, wayna xoojisaa, tusaalaha, qoriga, waa xoojisaa. Marka habruhu intaynaan nooga tegin, "Vitamin E" waxaa laga helaa geedka la yiraahdo garawga. Waxaan ku noqnoqonayaa inta kale ee aan caadadayna ahayn: balka iyo badarka, balka waxaa lagasameeyaa waxyaalo badan, xoolaha waa siisannaa, waxyaale kale oo badan waa laga sameeyaa, laakiinse waa la shidaa oo nafsaddiisa noocyadiisa kala duwan waxaa laga sameeyaa middaan la yiraahdo "biirrada", alkolada ayaa laga sameeyaa, badarka waa laga sameeyaa waxyaalo badan ayaa laga sameeyaa in kasta oo aan annagu ka samaysan, magacyada inta kaleeto, Axmed Nuur uu kulli carrabka mariyay, midabyada iyo noocyadaas oo dhan hadda duqaydii hawshaas iigaga fiicnayd ayaa u jooga iyaga ayaan u gudbinayaa oo waad mahadsantihiin.

Axmed Nuur — Horta cali Mudiiroow aad iyo aad baad u mahadsantahay. Xoogaa xifaalo ah inkasta oo aan raggayna iskaga baahnaan lahayn, xaggiinna baan gacanta u dhiibayaa oo waa kow. Mar haddii uu qof afartan iyo konton meelahaas soo gaaro, annagu odaynimadu waa na soo gashay, laakiin hal xifaalo ah baan ku noqonayaa. Haddayi markan canjeerada ka hadlaayay, Daahir Af Qarshe wuxuu ka hadlay in macallimiin loo raadiyo meesha la yiraahdo Awro. Wuxuu ka tegay bari oo asli ahayd, wixii xifaalo ayay iga ahayd. Marka aan aniga iyo ninka la yiraahdo Fiqi Buraale, waxaynu goosannay in Aw Daahir habar reer Bari ah lagu daro. Marka waxaan u gudbinayaa si uu midabbadii iyo magacyadii iyo xeerada soomaaliyeed oo aynu haddayi sheegnay Fiqi Buraale oo nastay ayaamahaan.

Fiqi Buraale — Ee waad mahadsantihiin. Horta arrimaha kan aad ka hadasheen si wanaagsan ayaad uga hadasheen, hase ahatee aynu kala soocno bal marka ugu horraysa, siday aniga ila tahay, afafku waa badan yihiin soorta ku saabsan, gallayda iyo masaggada, hase ahaatee, afafna waxaa weeye afaf innooga yimid carabiga xaggiisa oo aynu sidooda u qaadannay, afna waxaa weeye af soomaali aynu innagu ku isticmaalnay. Haddaba, si kastaba ha u kala baxdee, magacyada la kala sheeg-sheegayo iyo midabyada ee gallayda iyo haruurka ku saabsan markaynu niraahno, aynu soo qadanno bil matel, masaggada oo aynu niraahno labada magac ee loo kala yaqaanno. Soomaalidu waxay tiraahdaa masaggo, qolana haruur bay tiraahdaa. Waa kow. Markaas waxaa la yiraahdaa masaggo caddey waa noocee.